

# Dib-u-casriyaynta Portland Public Schools

U diyaarinta ardaydayada hogaaminta  
isbeddelka iyo horumarinta dunida



Waxaa sharaf inoo ah u adeegidda ardaydaydeena iyo bulshadaan anagoo ah xubnaha gudiga waxbarashada ee Portland Public schools (PPS). Waa mas'uulliyadaya in aan siino ardaydayada fursaha waxbarasho ee ay u baahanyihiin si ay oogu diyaar garoobaan ku guulaysiga mustaqbalkaas--Si waliba oo uu noqdo.

Waxaynu bilownay hannaankan aragt-fog uruurinta dayrtii 2018 saa waxaan rabnay in aan helno garashada ardaydeena, macalimiinteen, iyo bulshadeena, si ay nooga caawiyaan dib-u-casriyaynta Portland Public schools si loola jaan-qaad dunida dagdaga isku badalayso.

Xaqiqdii waxay ahayd arrin farxad leh in aynu aragno sida hannaanka aragt-fog uruurinta ay u soo jidatay hal-abuurnimada bulshadeena. Kummanaan dad ah oo kala matalayo kala duwanaanshaha bulshadeena, aaya kulama kala duwan si hagar la'aan ah noola qeybseday qibradooda, qeexay rajadooda, oo nagu biirayay ra'yigooda.

Shaqadu waxay u badnayd mid adag balse waxaa na dhiirigaliyay firfircoonda iyo jacaylka ka qayb-qaadashayaasha iyo xamigooda ay ilmaheena u hayaan.

Daah-furidda hal-abuurka waa arrin awood leh. Aragtida aad ku ogaan doontid bogaggan waa mid niyad dhisid iyo dhiiranaan leh. Si aynu halkaa u gaarno, dhamaanteen waa in aynu ka foogaanaa fikir-gaabnida oo aynu balaarinaa aaaminsanaanteena waxa suurta galka ah, mararka qaarna aynu ka dheeraanaa habacsanaanta iyo dhacdooyinka tagay. Ugu dambayntii, si wanaagsan ayaynu ooga jawaabi karnay xitaa jawaabaha ugu himilada fog su'aasha, "Maxaan samaynaa si aan u gaarno halkaa? " Saddexda bilood ee na xigto, saddex sano oo qorsho istaraatijiyadeed aaya la dhisi doonaa si looga miro dhaliyo isbeddelka aragtidaan.

Hannaankan sida aragtida ay dhalisay aaya si hamii leh loo waday. Waxaynu u mahadcelinaynaa caawinadda istuuidiyaha (Prospect studio), oo soo dhaweeeyay ra'jiga gudiga si loo helo hannaan baalaran oo bulshada gar-wadeen ka tahay. Waxaynu u mahacelinaynaa xubnaha shaqaalaha degmada, xogaamiyayaasha iskuulka, ardayda, waalidiinta, is-xilqaamayaasha, kuwaa oo shaqeeyay saacado badan-in badan ka tanaasulay xilliyadooda fasaxa-si ay kulamada bulshada uga miradhalayaan oogana dhigaan mid wax ku ool ah.

Si qaas ah ayaan uga mahadcelinaynaa dadka portland ee sii wada muujinta muhiimadda waxbarasha bulshada iyo taageeradooda PPS. Aragtidan ku dhisan bulshada waxay hagi doontaa sida PPS uga shaqayn lahyd u adeegidda arday waliba, iskuul waliba, maalin waliba. Waxaynu rajaynaynaa in aynu ka wada shaqayno ka rumaynta hamigaan rajo galinta leh.

Gudiga waxbarashada ee portland Public schools

# **Waxbarasho tayo leh, oo bilaash ah waxay taariikhyan ahayd bud- dhigga siyaasadda, bulshada, iyo habdhaqaqa dhaqaalaha wadankaan. Sidaa bayna mustqabalka sii ahaan.**

Gudiga waxbarashada ee  
Portland Public schools

Nidaam waliba ee iskuulada bulshada ee maraykanka, waa muhiim in bulshada guud ay cadeeyaan qeexidda waxa ay ka rumaysanyihiin waxbarasho buuxdo oo dhamaystiran iyo sifooinka ay kar abto aradada qalinjabisay. Hadda, 2019, waxaa durba inoo muuqdo in horumarinta ardaydayada si ay diyaar ugu noqdaan hogaaminta, hal-abuurka iyo maskax furnaanshaha dunida isku sii furmaysa ay aad muhiim ugu tahay in ka badan sidii hore. Aragtidaan-fog ee cad ee dib loogu cusboonaysiinayo nidaamka iskuulada, ayna dhiseen bulshada guud ee portland, waa mid diiradda saarayo horumarinta ilmaha iyo dhalinyaradeena si ay u noqdaan kuwo fikir qoto dheer iyo wada shaqeyn leh, kuwa daryeelo naxariisna leh una diyaarsan xallinta mushkiladaha dhabta ah ee dunida. Jiheeyahaan muhiim ka ah ayaa hagi doono jihada mustaqbalka iskuulka degmadeena.

Talaabteena xigto aaya ah u diyaarinta Portland Public Schools ka rumaysiinta aragtidaan. Micnaheedu waxay tahay shaqadeena hadba waxay diirada saari doontaa hubinta taageeridda agabka macalimiinta iyo nidaam badalidda loo baahanyayah in la sal dhigo si loo helo arday tusaale u ah Tiigsiga qalinjabiyaha " Graduate Portrait". Aragtidaan-fog way ka duwan tahay wayna ka xeel-dheertahay nidaamkii hore ee PreK-12, Aragtidaan dhalan doonto waa dib-u-casriyaynta waxbarashada Portland Public Schools si loo hubiyo in ardaydayada horumaraan oo guulaystaan si ay u nocdaan hogaamiyayaal wax qabad iyo qalbi furnaan leh. Nagu soo biir; Si wada jir ah aan dib-u-cusboonaysiino iskuulada Portland Public Schools.

**Guadalupe Guerrero  
Kormeeraha Guud**



## Tusmo

Hor-u-dhac

4

Tiigsiga Qalinjabiyaha  
(The Graduate Portrait)  
16

Ahmiyadda Macalimka  
(The Educator Essentials)  
24

Isbeddelka Nidaamka  
Waxbarashada  
32

Mustaqbalka PPS  
40

Hawlgalid  
42

Lifaaq  
43

Hor-u-dhac





# **Waa Maxay Aragti-fog?**

Aragti-fog waa tilaabbo geesinimo leh oo mustaqbalka lagu wajaho taa oo muujiso sawir cad oo ah tiigsiga aynu rabto in aan ka meel gaarno.

Waxay tilmaantaa bar-dhamaadka--"jiheeyaha"--kaa oo dhiiri-geliya ficol guud, hajo istaraatiijiyada, dardargaliyana kobaca. Aragtida-fog waxay naga caawisaa in aan suurayasano waxa macguulka ah dhinacna ooga baxno xaaladda hadda taagan. Waxay xoriyad noo siisaa hal-abuurnimadeena si aan mustaqbalkeena si ka duwan sidi hore oogu fikirnaa.

Aragtida-fog ma ahan istaraatiijiyad. Inkastoo Aragtida-fog ay cadayso hadafka la tiigsanayo iyo sababta loo tiigsanayo, istaraatiijiyada ka dambayso Aragtidaa-fog ayaa cadayso sida loo gaari lahaa hadafka. Inta aanan go'aansan sida aynu rabto inaan horay oogu socono, waxaan u baahannahay in aan ogaanno halka aan ku socono.

Aragtida-fog ee Portland Public Schools waxay diirada saari doontaa sida aan ka rabno ardadeena qalinjabisay in ay ahaadaan. Aragtidan-fog waa socdaal hal-abuurnimo, Aqoon kororsi, iyo Wanaajin leh, dhiiranaantiisana waxay dardar-galin kartaa horusocod ayadoo niyad-galinayso hawlqabasho iyo wada-shaqayn.

Ardayda ka soo qalinjabiyo Portland  
Public Schools wuxuu ahaan doonaa mid  
naxariis leh,  
fikir qoto dheer leh, lala shaqaynkaro oo  
xalin karo mushkilaadka, una diyaarsan  
in uu hogamiyo duni bulsho ahaan  
cadaalad ah.

# Maxaa keenay Aragtidaan-Fog Hadda?

Nidaamkeena iskuulka wuxuu ka jiraa duni isbeddelkeedu dagdag yahay. Mustaqbalka shaqada iyo waxbarashadana si xawaaro leh bay isku badalayaan. Hawlo iyo shaqooyin aan shan sano ka hor jirin baa hadda jira, isbeddelkaanna wuu sii socon doonaa. Intaa waxaa dheer, cadaadis cimilo oon la sadaalinmkarin baa saamayn ku yeelan doonto joob-waliba. Waxaynu rabnaa ardadeena in ay la qabsan karaan oo ay guulaysan karaan marka ay qalin-jabiyaa. Waxaynu rabnaa in ardadeena qalin-jabisay ay soo saaraan dareenkooga kartiyeed, hor-kacaan waxbarashadooda iyo wadada noolashooda, isbeddelkana la qabsadaan, ayagoo xajisanayo rajadooda, qorshahooda, iyo qiimahooga. Qalin-jabiyayaasha waxay la shaqayn kari doonaan kuwa kale oo leh qibrad-nololeed aad ooga duwan tooda. Waxaynu rabnaa in aynu u diyaarino qalin-jabiyayaasheena caalam ay wali ka jirto kala-takoor kala duwan oo aynu siino agabka ay ku noqon lahaayeen isbeddel doon iyo hogaan diyaar u ah in ay xaliyan arrinkaaan a si loo helo caalam sidan



Hogaanka Isbahaysiga

ka wanaagsan. Aragtidaan-fog waxay hiigsanaysaa dhisidda nidaam waxbarasho oo u diyaariyo qalin-jabiyayaasha mustaqbalka ugu wanaagsan iyo In la wajaho mustaqbalka ayadoo la filayo isbeddel, la dhisayana la qabsasho iyo dabar-adayg, ayadoo lala tacaalayo cadaalad-darada.

Hadda iyo horaanbo, sida caasimadaha kale oo badan, Portland waxay la daala-dhacday takooridda joogtada ah ee dadka dalka u dhashay, midab-cunsuriyayn, kuwa naafada ah, dumarka iyo qowmka LGBTQ+. Portland sidoo kale waxay leedahay hal-abuur qaas u ah, ooy ka mid tahay taarikhda maaraeynta deegaanka iyo dhaqdhaqaqa.

Aragtidaan-fog waxay ku dhisantahay niyada hal-abuurnimo, ayadoo u isticmaalayo xallinta cadaalad-darada hadda iyo tii hore una diyarinayso dadkayaga yaryar guul.

Aragtidaan-fog waxaa bud-dhig u ah taariikhda iyo hiigsiga mustaqbalka ee Portland. Waxay ka

jeedinaysaa hadal cad oo ku saabsan samaynta sinaanta jinsiga iyo xiriirkha sinaanta mid ka mid ah caqabadaaha ugu waaweyn ee wajahaya adduunka: waa isbedelka cimilada adduunka. Portland waxay noqon kartaa meel ay qaxootiga cimiladu u guuri doonaan sanadaha soo socda. Hada waa waqtigii loo baahnaa hoggaanka deegaanka, aragi, iyo ujeedo, aragtida la xiriirta aduunyada si loo abuuuro mustaqbal dhalaalaya ahna mustaqbal loo sii xajin karo dadkeena yaryar.

Nidaam iskuul ahaan, waxaan tiir dhaxaad u nahay u diyaarinta qalin-jabiyayaasheena in ay ku guulaystaan dunida siina wanaajiyaa, hadana hawsha ah mustaqbal u diyaarinta yaraankeena way naga wada dhaxaysaa. Aragtidaan-fog ee ardaydanada waxay guulaysan kaliya hadaan wada shaqayno. Aragtidaan waaa hawlgal hamisare ah uguna yeerayo caasimadda iyo bulshadaba taageeridda ardayda PPS.

# Geedi socodka

Dayrtii 2018, Gudiga wax barashada iyo Kormeeraha Guud ee PPS waxay bilaabeen geedi socod bulshada u dhantahay si loogu dhiso Aragtidi-fog Waxbarashada guud ee Portland. Aragtiddan-fog waxay sifaynaysaa waxa u rumoobi doono qalin-jabiyayaasha sanadka 2030, iyo sida sii kordhayso, xaqiiqada qalin-jabiyayaasheena wixi ka bilowdo 2019.

Walxaha Aragtidaan-fog waxaa isla dhisay Isbahaysiga Hogaaminta--koox ku dhaw 90 qof oo ka kala yimid Portland, kala matalayana qowmiyado iyo fikiro kala duwan--iyo talooyin ay nala wadaageen bulshada guud, inta lagu guda jiray 35 kulan bulsheed iyo labo sahmin bulshdeed (si aad u heshid macluumaa dheeri ah eeg Kharriidada Socdaalka). Shaqada waxaa ka mid ahaa baaritaanka isbeddelka mustaqbalka oo suurta gal ah in uu saameeyo waxbarashada Portland; Ayadoo aan wax ka baranayno hawlaho iskuulada iyo hay'adaha haatanba ku guda jira fikirada ay PPS danaynayo in ay la qabatito; iyo ayadoo la curinayo layliyo tix-galinayo baahida ardayda, macalimiinta, qoysaska, iyo xubnaha bulshada.

Geedi socodka wuxuu hawlay kumanaan daneeyayaal ah-- oo ay ka mid yihiin ardayda, qoysaska, macalimiinta, shaqaalaha degmada, xubnaha dowlada, ganacsatada, bulshada, iyo hoggaamiyayaasha samafalayaalka--oo soo saaray ku dawaad 16,000 oo goobo xog taasi oo naqotay aas-aaska walxaha Aragtidan-fog.



## **Khariiradda**

### **Socdaalka**

Khariiradaan

Socdaaleed waxay  
cabiraysaa xilliyada iyo  
kulamadii isdaba jooga  
ahaa ee bulshada  
dayrtii 2018, taa oo ku  
soo gabagabowday  
bandhigi matxafka  
sayniska iyo  
warshadaha ee Oregon  
(OMSI)  
ee Maarsa 2019.

Hawlahaan waxaa ka  
mid ahaa kulamada  
ardayda, saddex kulan  
oo hogaanka  
isbahaysiga ah, shirar  
badan oo lagu  
beegsaday bulshada  
guud ee caasimada,  
laba sahan ee bulshada  
guud ah, Aqoon-korosi,  
iyo shirar shaqo oo lala  
yeeshay Gudiga wax  
barashada. Dhammaan  
kulamada iyo sahamada  
guud ee bulshada  
waxay ku baxaayeen  
lixdha luuuqadood ee ay  
ogashahay PPS (

Ingiriis, Isbaanish,  
Shiinays Mandarin,  
Ruushka, iyo Soomaali).



### **Kulanka Ardayda**

DISEEMBAR 1

Xirfadee, Aqoontee,  
Akhlaaqdee iyo fikir  
maskaxeedkee ayay u  
baahanyihiin qalin-  
jabiyaasha  
mustaqbalka si ay u  
guulaystaan?  
Hogaanada ardayda ee  
ka kala yimid iskuulada  
sare ee PPS waxay nala  
wadaageen ra'yigooda  
oo ay ka wada hadleen  
tilmaamaha dadka  
waaweyn looga  
baahanyahay in ay  
yeeshaan si ay u  
caawiyaan barashada  
ardaydayda.



### **Isbahaysiga Hogaaminta**

# 1

Firo-dheeri

Istaraatijiyadaysan iyo

Naqshad Cad

DISEEMBAR 7-- 8

Xubnaha Isbahaysiga  
Hogaaminta waxay baareen  
mustaqbalka shaqada iyo  
waxbarshada, waxay  
dhagaysteen  
xubno ka tirsan mustaqbal ka  
fakarayaasha, waxay eegeen  
xaaladaha mustaqbalka

Portland. Xaaladahaan waxaa  
lagu xusay lifaqa. Xubnaha  
sido kale waxay isku hawleen  
naqshada cad si ay oga hadlaan  
sida isbaddalkaan u saamayn  
doono ardayda, macalimiinta,  
iyo qoysaska Portland, iyadoo la  
adeegsanayo miitaal\*.

Isbahaysiga waxay cayimeen  
nuqluka koobaad ee ra'iyada  
ku saabsan waxa ay ardayda u  
baahantahay markay qalin-  
jabiyaan iyo waxa macalimiinta  
u baahanyihiin si ay u  
caawiyaan ardayda.

Mitaalku waa qof la alifay ee  
matalayo  
baahida, qibradda, iyo aqlaaqda  
tusaale ahaan ardayda jiri  
doono mustaqbalka, xubnaha  
qoyska, iyo macaliminta,  
waxaana loo isticmaalaa  
shaqada naqshadaynta si ay  
ooga caawiso fahamka cidda  
Aragtida-fog ay quseyso.



### **Taxanaha La falgalka**

#### **Bulshada # 1**

JANAAYO 15-26

Waxaa la qabtay labaatan  
iyo shan kulan ee bulsho,  
hal ka mid ah uu ahaa  
dhamaan bulshada PPS,  
iyo sahan onlyn ah, iyadoo  
in ka badan 1,700  
daneeyayaal ay talooyin  
bixiyeen. Waxaa ka  
aruuriyay in ka badan  
9,000 oo xog ah, kana  
tarjumaya walwalka hadda  
iyo kan mustaqbalka ay  
rabto bulshada PPS, iyo  
dadaalka la rabo in la  
bixiyo si loo gaaro

mustaqbalka la rabo. Sidoo  
kale waxaa laga hadlay  
ahmiyadda  
Aqoonta, dhaqamada, iyo  
maskax-fikireedka qalin-  
jabiyaasheena ay u  
baahanyihiin si ay u  
guulaystaan qaan-gaar  
ahaan.



### **Wadada loo qaadayo**

#### **Waxbrashada**

JANAAYO

Shaqaalahaa PPS iyo  
xubnaha Hogaaminta

Isbahaysiga waxay  
booqdeen iskuulo iyo ururo  
waxbarasho oo hal-abuur  
leh ee ku yaal San Francisco  
Bay Area and the Pacific  
Northwest. Bogga

intarneetka ee ku slaysan  
waxbarshada intarneetka  
ayaa la aas-aasay, kaa soo  
bandhigayo 70 tusaale ee  
isbedelka mustaqbalka ee  
dhinacyada deegaanka,  
cuntada, aqoonsiga,  
hay'adaha, dalxiiska,  
tiknoloyiyada, gaadiidka, iyo  
shaqada, iyada oo ay la  
socoto hal-abuurnimada  
waxbarsho.

### **Pacific Northwest**

JANAAYO 23

- Seattle Public Schools Early Learning
- Raisbeck Aviation High School
- University of Washington College of Education and Professional Programs

### **San Francisco Bay Area**

JANAAYO 28-29

- Katherine R. Smith Elementary
- Bulldog Tech Middle School
- Exploratorium
- Samaschool
- General Assembly
- 826 Valencia Tenderloin Center
- Willie L. Brown Jr. Middle School
- San Francisco Unified School District's African American Achievement Leadership Initiative
- UniteSF

### **Virtual Learning Journey**

[PPS.net/learningjourney](http://PPS.net/learningjourney)

2018

2019



## Kulanka Hogaanka

### Isbahaysiga ee #2

Qaabaynta Tiigsiga  
Qalin-jabiyaha, Tiigsiga  
Qofka weyn, iyo Isbedelka  
Nidaamka

FEBRAAYO 1-2

Kadib dib-u-eegis lagu  
sameeyay talo-bixinta  
bulshada iyo la wadaagidda  
fikradaha Wadada loo  
qaadayo Waxbrashada,  
Gudiga Isbahaysiga wuxuu  
qeexay walxaha Tiigsiga  
Qalin-jabiyaha lana  
aqoonsaday Nidaam  
isbeddelka loo

baahanyahay si loo gaaro  
Tiigsiga Qalin-jabiyaha.  
Guddi arday ayaa ka  
munaaqashooday dadka  
waaweyn ee saamaynta ku  
leh noolashooda- gaar  
ahaan macalimiinta-  
waxayna aqoonsadeen  
aqlaaqda iyo sifooinka  
wanaagsan ee dadkan  
waaweyn oo dareensiyyay in  
taageero loo hayo. Ka dib  
markay dhagaysteen  
ardayda, xubnaha  
Guddoona Isbahaysiga  
waxay qeexeen  
muhiimadda aqonta,  
xirfadaha, aqlaaqda, iyo  
maskax-fikireedka ay u  
baahanyihii qaan-gaarka  
si ay u taageeraan cobaca  
iyo guusha ardayda.



### Taxanaha La falgalka Bulshada # 2

FEBRAAYO 20 - MAARSO 2

Isku-tag dheeraad ah iyo  
labo kulan oo dhammaan  
bulshada caasimada ah  
ayaa la qabtay si jawaab  
celin looga helo  
ahmiyadda Tiigsiga  
Qalinjabiyaha (Graduate  
Portrait) iyo isbedelka  
nidaamka, iyada oo ay la  
socoto talooyinka ku  
saabsan aqonta dadka  
qaan-gaarka ah,  
xifadahooda,  
aqlaaqdooda, iyo maskax  
fikirkooda loo  
baahanyahay si loo  
caawiyo ardayda.



### Kulanka Hogaanka Isbahaysiga ee #3

Ahmiyadsiinta Walxaha  
muhiim ka ah iyo qiimaha  
asaasiga ah  
MAARSO 15-16  
  
Xubnaha Hogaanka  
Isbahaysiga waxay  
dib-u-eegis ku  
sameeyeen talooyinka  
bulshada waxayna soo  
saareen tilmaamaha  
muhiimka u ah Tiigsiga  
qalinjabiyaha (Graduate  
Portrait), Tiigsiga Dadka  
qaan-gaark ah (Adult  
Portrait)  
iyo Isbedelka Nidaamka.  
Xubnaha waxay kaloo  
tilmaameen qiimaha  
muhiimka ah ee loo  
baahanyahay taageeriddi  
Aragtidaan-fog.



### Kulanka Wada-shaqaynta Gudiga iyo Hogaanka Sare

ABRIIL 2

Kulamadaan shaqo,  
xubnaha Gudiga  
waxbarashada iyo  
kooxda  
hogaanka sare ee  
degmada waxay isla  
eegeen waxa ay soo  
saareen Gudiga  
Isbahaysiga kulankii #3.  
Kooxo yar oo ka kala  
socdo xubnaha  
Gudiga iyo kooxda  
hogaanka sare, hogaanka  
degmada ayaa dib-iskula  
eegay warbixinada  
saddexda qodob ee ugu  
muhiimsan Aragtidaan-  
fog, iyo sidoo kale  
qiimaha muhiimka ah, si  
loo hubiyo fikradda guud  
in ay la jaan-qaadayso  
talooyinka bulshada.



### Raakibidda Bulshada

MAAYO 11

Kulankan ugu  
dambeeyay, gabagabada  
qoraalkii qabyada ahaa  
ee warbixinta Tiigsiga  
qalin-jabiyaha,  
Ahmiyadda Macalinka  
(laga soomaga-caabay  
"Tiigsiga dadka qaan-  
gaarka ah"), iyo  
Isbeddelka Nidaamka  
ayaa la horgeeyay  
bulshada si fursad  
kamadambays ah  
ay uga soo jawaab  
celiyaan. Baaritaan-guud  
ayaa oo ku saabsan  
heerka ogolaanshaha  
warbixintaan ayaa la  
sameeyay  
gabagabada hawsha.

## Aragtida-fog ee PPS

### Aragtida-fog ee Ugu dambayso

JUUN 2019

Aragtida-fog ee Portland  
Public Schools waxay  
diirada saari doontaa sida  
aan ka rabno ardadeena  
qalinqabiyay  
in ay ahaadaan.

Aragtidan-fog waa socdaal  
hal-abuurnimo, Aqoon  
kororsi, iyo Wanaajin leh,  
dhiiranaantiisana  
waxay dardar-galin kartaa  
horusocod ayadoo  
niyad-galinayso  
hawlqabasho iyo wada-  
shaqayn.

Ardayga ka soo qalinqabiyo  
Portland Public Schools  
wuxuu ahaan doonaa mid  
naxariis leh, fikir qoto  
dheer leh, lala  
shaqaynkaro oo xalin karo  
mushkilaadka, una  
diyaarsan in uu hogaamiyo  
duni bulsho ahaan  
cadaalad ah.



## Qeybaha Aragtida-fog

Aragtidan-fog waxay ka kooban tahay Afar qeybood: Tiigsiga qalin-jabiyyaha (Graduate Portrait); in ahmiyadda Macalimka ah (Educator Essentials); in Isbeddelka nidaamka waxbarasho (Educational System Shift); iyo in Qiimaha Aas-aasiga ah (Core Values). Tiigsiga Qalin-jabiyyaha wuxuu diirada saarayaan natijoojinka ardayga, oo ay ka mid yihiin waxa ay baran doonaan, ruuxa ay noqon doonaan, iyo waxa ay samayn karaan xilliga ay qalin-jabiyaan. Hadaynu rabno in wax ay u rumoobaan qalin-jabiyyaasha PPS, dadka qaan-gaarka ee caawiyo-qaasatan Macalimiinta-waxay sidoo kale u baahnaan doonaan in ay yeeshaan aqoon, xirfad, maskax-fikireed, iyo aqlaaq qaas ah. Hadii aynu rabno in qalin-jabiyyaha yeesho tilmaamaha Tiigsiga--macalimiintana lagu taageero in ay yeeshaan xoogana saaraan tilmaamahaan--dhammaan degmada iskuulka waxay u baahantahay in ay is

badasho si loo hubiyo in sidaa la helo.

Ahmiyadda Macalinka waxay diiradda saaraysaa aas-aaska "sida laga rabo" macalin kor-u-qaadi karo horumarka arday waliba iyo gaaridda Tiigsiga qalin-jabiyyaha. Ahmiyadda Macalinka waxay noqon doontaa qeybka mid ah isbeddelka nidaamka iskuulka si ardayda looga caawiyo isbeddelka nidaamka wax barashada, taa oo diiradda saaraysa suurtagalinta kobaca ardayda iyo dadka qaan-gaarka ee PPS.

Qiimaha aas-aasiga ah waa mabda'a anshaxa hagi doono fikilada degmada si Aragtidaan-fog looga rumaysiyo. Aragtidaan-fog waxaa lagu jeediyyay sidi wax laga soo gudbay ama iyadoo horay u dhacday, si loo helo dareen ah mustaqbalka ay sharaxday suu u ekaan karo.

# Jaantus Isku-dhaf ah

Jaantuskaan wuxuu walxaha  
Tiigsiga qalin-jabiyyaha  
ku-dhafayaa Ahmiyadda  
macalimka iyo Isbeddelka  
Nidaamka Waxbarashada.  
Wuxuu muujinaya in  
Tiigsiga Qalin-jabiyyaha uu  
tiir-dhexaad u yahay,  
bartankana ooga jiro wax  
waliba uu iskuulka degmada  
qabanayo. Waxa caawinayo  
Tiigsiga Qalin-jabiyyaha waa  
Ahmiyadda Macalimka.  
Walxahaan qaarkood  
aya ku toosan walxaha  
Tiigsadaha qalin-jabiyyaha,  
tusaale ahaan sida  
naxariista iyo daryeelka,  
Macalimiin naxiirs iyo  
bani'aadinimo leh oo  
caawiyo Qalin-jabiyaal  
is-iftiimyo, naxariis iyo  
awood siinna leh.  
Qaarkoood waxay ahaan  
toos balse gooni  
ahaantooda u awood leh oo  
macaliimta looga  
baahanyahay in ay dhisaan  
jawi ay ardayda ku  
guulaysan karaan. Lakabka  
sare ayaah ah Isbeddelka  
Nidaamka waxbarashada  
kaa oo sii dhisayo jawigaan  
siinayana caawimaad  
macalimiinta iyo  
ardaydaba si ay u yeeshaan  
aqoonta, xirfadda iyo  
aqlaaqda mustaqbalka  
ku hagi lahayd.



## **PPS Mabda'a muhiiimka ah**

Mabda'a muhiimka ah waa aaminsanaanta ururka ee aan baaba'ayn xillina aan isku badalin. Iyadoo bayaan lagu qeexayo mabda'aan lagu xirayo Aragtida-fog, ururku wuxuu cadeynkaraa sharciga anshaxaa facilada ku hagayo Aragtidaa-fog.

Toban kaan bayaan way cusubyihin, waxay qeexayaan mabda'a muhiimka ah een u baahannahay si aan u hirgelino Aragtida-fog. Mabda'aan qaar baa lagu dakhmi qaarna waa dhiirigalin kaliya; si waliba ha ahaatee waxaan aaminsanahay in aan ka dhigno mid cad oo joogto ah inta lagu gudo jiro shaqadeena xilli walbo.



### **Ardayda oo Tiir-dhexaad ah**

Waxaan rumaysannahay in dhammaan ardada ay leeyihii karti ay ku guulaystaan in saameyn wanaagsan ardada lagu yeeshana ay dhextaal u tahay go'aan iyo ficol waliba. Waxaan aaminsannahay in soojeedinta ardada ay muhiim u tahay fahmizza iyo xallinta arrimaha saldhigga u ah waxbarashada codka aradadana ahmiyad buu leeyahay.

### **Sinaanta Jinsiga iyo Caddaaladda Bulshada**

Waxaan aaminsannahay xaqqa aasaasiga ah ee sharafta bini-aadannimada iyo abuurista aduunyo isku mid ah waxay u baahan tahay nidaam waxbarasho oo si ula kac ah u buriyo-- una abaabiyo hoggaamiyeaal si loo buriyo nidaamyada xaq-darrada ah.

### **Daacadnimo iyo Sharaf**

Waxaan aaminsannahay in aan muujino daacadnimo iyo sharaf ficol kasta oo aan qaadno, oo leh wada-hadal sax ah, anshax, daahfurnaan, iyo wada-xisaabtan iyo go'aan qaadasho u adeegiddayaada ardayda, qoysaska, shaqaalaha, iyo bulshada.

### **Heer-sare**

Waxaan aaminsannahay in heerar sare oo dhamaystitan ay dhammaan ardayda iyo shaqaalaha helaan, iyo in ay gaaraan heer sare iyo waxqabad sare waxay ka dhalatay nidaamka iskuulada ee u dhaqma sida urur waxbarasho oo joogto ah.

### **Ixtiraam**

Waxaan aaminsannahay ixtiraamka in ay helaan dadka oo dhan. Qof kasta wuxuu keenaa qiimo waxa uuna u qalmaa in lagula dhaqmo xannaano, niyadwanaag, iyo naxariis.

### **Xiriirkha**

Waxaan aaminsannahay in xiriiradu ay muhiim u yihiin guusheena. Xiriirkha aadanaha ee asaliga ah, oo lagu abuurayo sifo, cilaqaad daryeel, wuxuu abuuraa kalsooni, kobcinta fahamka, iyo xoojiyaa awooddeena inaan u wada shaqeeyno ujeedooyinka la wadaago.

### **Wax-soo-saarka iyo Dib-u-habaynta**

Waxaan aaminsannahay awoodda xalinta mushkilada wax ku oolka ah, oo ay taageerto dhaqanka hal-abuurnimada iyo dib-u-habaynta. Caqli galinta fikradaha, kobcinta xiisaha, soo dhaweynta fikradaha cusub, iyo horumarinta xirfadaha fekerka dambe ee lagama maarmaanka u ah horumarinta istaraatijiyado wax ku ool ah oo isbeddel leh.

### **Iskaashiga iyo**

#### **Wada-shaqaynta**

Waxaan aaminsannahay in wadajir ahaan, aan ognahay oo aan gaari karno heshiis weyn, iyo in aan qaadno tallaaboooyinka wadajirka ee kooxaha daneeyayaasha ah, waxaan ku guuleysan karnaa Aragtidayada-fog.

### **Waxaa Saldhib u ah hididiilada Portland**

Waxaan aaminsannahay in aqoonsigeena gaarka ah ee Portland uu yahay garashada wadajirka ee inaan aqoonsanno oon wax ka barano taariikhda bulshadeena kal duwan oon sii dardargalino horusocodkeena casrigaan cusub si wadajir ahna oo ay jeesinimo iyo hal-abuurnimo ku jirto aan u dhisno Portland wanaagsan.

### **Barashada iyo Hoggaan farxad leh**

Waxaan aaminsannahay barashada iyo hoggaaminta siyaabaha loo hormarinayo xiriirinta aadanaha, qadarin qoto dheer ee midba midka kale, qanacsanaanta shaqadayada, iyo qadarinta habka waxbarashada.



## Tiigsiga Ardayga Qalinjabiyaha (The Graduate Portrait)







## **Maxay Tiigsiga Ardayga Qalinjabiyyaha(The Graduate Portrait) muhiim u tahay?**

Tiir-dhexeha Aragtida-fog ee waxbarashada bulshada waa Tiigsiga qalin-jabiyyaha. Waa balan aan ka qaadnay ardadeena iyo qoysaskeena... balan maalin walbo ay dadka waaweyn ka qaadaan dhammaan ardada. Natijjo ahaan, fici kasta oo qaangaar ah iyo nidaam kasta oo isbeddel ah waxaa lagu xalliyaa go'aanada ka soo baxa natijjooyinka ardayga ee ku saabsan Tiigsiga Qalin-jabiyyaha.

## **Waa Maxay Tiigsiga Ardayga Qalinjabiyyaha(The Graduate Portrait)?**

Tiigsiga Ardayga Qalinjabiyyaha waa faahfaahin cad oo hisgi leh oo ah waxa bulshada ay rabto in ardaydeedu ay ogaadaan, noqdaan oo awoodaan inay sameeyaan, si ay ugu diyaariyaan inay ku guulystaan noloshooda iyo xirfadooda. Tiigsiga Qalin-jabiyyaha waxaa ka mid ah sifooyinka loo baahan yahay si loogu diyaariyo ardayda si ay u fahmaan, uga hortagaan, una bedelaan jawi bulshadeed caalami ah oo ay ka mid yihiiin caddaalad darada iyo nidaamyada huriyo dulmiga. Tiigsiga Qalin-jabiyyaha wuxuu dhiirigeliyaa oo hirgeliyaa macalimiinta iyo shaqaalaha degmada si loo kobciyo casriyeenta ay abuuraan calaamadaha ku saabsan mustaqbalka iyo in ay gaaraan natijjooyin iyagoo daboolaya baahida



Xaliyayaasha  
dhibaatooyinka si  
Iskaashi  
leh loona dhanyahay

Kuwa feeejigan  
si qoto-dheerna  
u fikiro lehna aqoon  
baaxad leh

Kuwa ah  
Hogaamiyayaal  
Isbeddelka  
Sinnaanta  
Jinsiga sababa

Kuwa Dhabar-adayg  
ijo Aqoon-kororsi  
joogta ah leh



### TIIGSIGA QALIN-JABIYAHAA (GRADUATE PORTRAIT)



Awood  
leh cod-karna  
ah



Qalin-jabiyayaal  
rago wanaag iyo  
mustaqbalka ka fakaro

Qalin-jabiyayaal  
Dib-u-eegis,  
Feejignaan, iyo  
Awoodsiiin leh

Saameeyeyaaal  
xog-ogaal u ah  
arrimaha dunida



**Xaliyayaasha  
dhibaatooyinka si  
Iskaashi  
leh loona  
dhanyahay**



Ardaydu waa xirfadleyaal, u xalliyo dhibaatooyin si hal-abuur leh si waxtar lehna u wada shaqeeyo. Waxay yaqaanaan sida loo xalliyo dhibaatooyinka culus, oo ay ku jiraan fahamka dhibaatooyinka dhinacyo kala duwan leh iyo abuuridda xal tixgelinaya baahida dadka. Waxay raadiyaan siyaabo cusub oo lagu wajiji karo dhibaatooyinka iyaga oo loola eegayo fikradi hore iyo aqoonsi xalal hal abuur leh. Iyada oo loo marayo khibradaha xalinta khilaafadka dadka ka soo jeeda dhaqammo kala duwan, oo ku hadlaya luqado badan lehna awoodo kala duwan iyo kuwa garashada, ardaydu waxay noqon doonaan kuwo xirfad u yeesho muujinta aragtidooda, aragtida sawiridda fikiro kala duwan, iyo u xalinta dhibaatooyinka si wadajir ah u wada shaqeeya, shakhsii ahaan iyo si caadi ahba. Ardaydu sidoo kale waxay yaqaanaan inay isticmaalaan aqoon kala cilmi ah si ay dhibta ugu xalliyaa qalab iyo xirfado cusub.

**Kuwa feeejigan si  
qoto-dheerna u  
fikiro lehna aqoon  
baaxad leh**



Ardeydu waxay muujiyaan faham aqooneed iyo xirfado tacliimeed. Iyada oo la adeegsanayo indho-indhayn cilmi kala duwan ah sida (sayniska, cilmiga bulshada, xisaabta, suugaanta, farshaxanka, ciyaaraha fudud iyo muusikada), ardaydu waxay kororsan doonaan xirfado aasaasi ah ee ilbaxnimada (akhriska, qorista, hadalka, dhageysiga), xisaabta, iyo fikirkha muhimka ah. Waxay akhrin karaan oo falanqeyn karaan macluumaadka, waydiin doonaan su'aalaha ku habboon, iyo inay yeessaan doodo adag oo ku saleysan xaqiqida iyo caddaynta. Waxay kasban doonaan cilmi xisaabeed xooggan oo ay ku xaliyaan carqaladaha dunida, oo ay ka mid tahay maaliyadda. Waxay sidoo kale yihiin baadhayaal cilmi-baaris ah, awood u leh in ay sahmiyaan dunida dabiiciga ah iyaga oo soo saaraya su'aalo khuseeya, samaynta cilmi-baaris, dhissidda qiyaso, samaynta tijaabooyinka, ururinta iyo falanqaynta xogta, iyo soo-gebogebaynta.

Waxa kale oo ay leeyihiin qadarin qoto dheer leh iyo qibrad farshan, hal-abuurnimada, iyo is-cabiridda shakhsii ahaan iyo kooxba. Waxay ku dhaqmaan caadooyin caafimaad oo jir iyo mid maskaxeedba ah si ay u lahaadaan nolol tayo sare leh. Waxay taariikhda ka baran karaan aragtiyo kala duwan waxayna fahmi karaan sida horay sheekooyinka taariikhiga ah ay u sameeyeen dhaqamada awoodda lahaa, iyo sida ay sheekooyinkani u sameeyeen xaaladaha hadda jira. Waxay sidoo kale yihiin kuwa si wanaagsan u isticmaala tiknoolajiyada casriga ah iyo qalabka sii kordhaya ee qalabka garashada farsamooyinka, qalabka tiknoolajiyada ku salaysan ee simaya hababka aadanaha sida aqoonsiga hadalka iyo raadka, aragtida, hadalka, barashada iyo falanqaynta, si kor loogu qaado awooda aadanaha ee xallinta dhibaatooyinka.

**Kuwa ah  
Hogaamiyayaal  
Isbeddelka  
Sinnaanta  
Jinsiga sababa**



Maaddaama ay yihiin hoggaamiyeyaasha sinaanta jinsiyadaha, ardaydu waxay ka qayb qaadan doonaan samaynta bulsho ay u siman yihiin si aad u fiican oo u siman dadka midabka leh. Waxay fahamsanyihiin sida bulshadeena ay u saamaysay cadaaladda-darada jinsiyadda, waxayna aqoonsadaan oo faragalin ku samayn karaan xaaladaha abuuro. Waxay kasbadaan is-xilqaan iyo xirfadaha u-qareemeynta si ay uga hortagaan caddaalad darrada iyo bedelida nidaamka cadaadiska ee bulshadooda. Waxay fahamsan yihiin in warbixinada taariikhda awoodda leh ay yarayn karaan aragtida dadka midabka leh kuna biirin karto midab-takoorka. Waxay hoos u dhigi karaan sheekada awoodda waxayna u beddeli karaan mid isku dheelitiran loona dhanyahay. Ardaydu waxay ixtiraamaan aragtiyada dhaqamada oo dhan. Maadaama ay yihiin kuwa xalliya dhibaatada cunsuriniimada, kuna lug leh wadahadalada bulshada ee ku saabsan arrimaha cadaaladda sidoo kalena gacan ka gaysto dhisidda iyo fulinta xalalka ixtiraamo tix-galiya aragtida dhaqamada kale.





**Kuwa Dhabar-adayg  
iyo Aqoon-kororsi  
joogta ah leh**



Ardaydu waxay diyaar u yihiin in la socdo oo ay la qabsadaan caqabaha adag ee nolosha. Waxay wajiji karaan xaaladaha aynan jeclaysanin si joogto ahna guuldarada ooga gudbi karaan guul ayagoo la qabsanayo jawiga ama badalayo. Waxay ku fikiraan in ay maskaxdooda kobci karo, ayagoo garanayo in kasbashada aqoon iyo xirfad cusub ay mar waliba suura gal tahay, guuldaradana waxay u arkaan fursad ay wax ka bartaan. Waa xog-ogaal aqoon leh iskoodna joogto wax u barto, waxay si qab-weyni ah ugu doodaan xuquuqdooda iyo nafyooda. Waxay adeegsanayaan hantida bulshada iyo dhaqanka si ay u horumariyaan shabakadaha xulafadooda si ay uga caawiyaan inay u adkaadaan caqabadaha iyo inay qaataan barashada joogtada ah ee kobcinta xirfadlaha iyo fulinta shaqsieed.

**Awood  
leh cod-karna  
ah**



Aradaydu si cod-karnimo leh bay u xiriiraan ayagoo is-abaabulayo, qorayo, aqrinayo, la imaanayana oraah cad, macquul ah, qancinna leh. Waxay fahamnsanyihiin muhiimadda dhaqamada, waqtiga, goobta, iyo macnaha guud ee hababka habboon ee isgaadhsiinta iyo waxay la qabsan karaan siyaabaha ay ula xiriiraan xaaladaha kala duwan. Waxay u xiriiraan si kalsoonni ku jirto kana warhayaan baahidda ah in ay qaladaadkooga shaqsieed baabi'yaan marka ay wax curinayaan waxayna u xiisaan aragtida qofka kale. Waxay isticmaalaan xirfado dhegeysi oo wax ku ool ah si ay u fahmaan fikradaha kala duwan ee aragtida si ay u abuuraan murti xaqiil ah, u diir-naxayo kuna habboon dadka dhagaystayaasha ah ee kala duwan. Waxay fahamsan yihiin awoddha macluumaadka iyo sida ay u saameyn karto waxa uu dadka aaminsan yahay. Waxay dooran karaan oo isticmaali karaan agabyo isgaarsiineed oo kala duwan si ay u gudbiyaan fikradaha iyo macluumaadka qoraalka iyo magal iyo muuqaal, teknoolajiyada digitaalka ah, muuqaalka la casiriyeeyay (augmented reality), sheekayn, dood, iyo qaababka kale ee tacbiirin ah, sida shakhsiyaad iyo koox-koox farshaxan iyo fan u abuuridda.

**Kuwa  
Dhiirigelin,  
kalsooni, iyo  
isgarasho leh**



Ardaydu waxay qabaan dareeno wanaagsan oo ku saabsan aqoonsigooda shakhsii ahaaneed iyo dhaqanka iyo dareen kalsoonni iyo is-qiiimeyn caafimaad leh ah. Waxay ku xiran yihiin shabakadaha isbahaysiga kuwaas oo u adeega inay u noqdaan tusaale iyo u doodayaal, kuwaa oo xoojinayo kalsoonidooda iyaga oo kobciya dadnimadooda shakhsii ahaaneed iyo dhaqankooda iyo xooggooda. Ardaydu waxay tilmaami karaan ilaha farxada iyo raali-ahaanshahooda waxaynaa raadsadaan hawlo la xiriira danahooda. Ardeydu waxay aqoonsan karaan oo ay xakamayn karaan shucuurtooda iyo inay si xirfad leh ula macaamilan kuwa kale ayagoo wacyigashan bulshadana xog-ogaal u ah. Waxay leeyihiin xirfado isku-doodid iyo xirfado xiriir-maamul oo u suurtageliya inay abuuraan xuduudo caafimaad leh, muujiyaan aragtidooda, ayna u maamulaan khilaafyada si diblomaasiyad iyo daryeel leh.



**Saameeyayaal ka  
xog-ogaal u ah  
arrimaha dunida**



Ardaydu waxay diyaar u yihiin inay ku noolaadaan oo ka shaqeeyaan jawi caalami ah iyada oo la adeegsanayo fursado waxbarasho iyo luqado kala dhaqamo duwan leh iyo khibrado waxbarasho oo u bilaabanaya fasalada koobaad/ xanaanada hore. Waxay aragtiyo kala duwan ka fahamsan yihiin taariikhda adduunka. Waxay si wanaagsan u yaqaanaan in ka badan hal luuqad, waxayna qiimeeyaan dhaqamada iyo luuqadaha kala duwan. Ayaga oo ah wakiilada isbeddelka caalamiga ah, waxay mas'uul ka ahaan maamulka deegaanka iyo aqoonta ku saabsan arrimaha caddaalada cimilada. Ardaydu waxay yaqaaniin sida loo isticmaalo tiknoolajiyada si ay uga wada shaqeeyaan kooxaha mashruuca ee leh asxaab, deegaan, wadamo kala duwan, iyo si caalami ah. Iyadoo loo marayo waaya-aragnimadan, waxay bartaan sida caqabadaha maxaliga ah ay uga mid noqdaan arrimaha waawayn ee qaranka iyo caalamka iyo fahmizza sida go'aannada aan qaadano ay u saameyo deriskeenna adduunka iyo sida go'aanadooda noo saameeyo. Waxay sidoo kale qiimeyeen karaan munaasabadaha hadda jira oo si ficiil ahaan ah u fahmi kara sida warbaahinta iyo ilaha kale ee macluumaadka ay saameyn ku yeeshaan.

**Qalin-jabiyyaal  
Dib-u-eegis,  
Feejignaan, iyo  
Awoodsiin leh**



Ardaydu way isku kalsoon yihiin, is-xisaabiyaan, waxayna awoodaan inay aqoonsadaan qaladaadkooga shakhsiyadeed ee ku wajahan dadka, dhaqamada, iyo xaaladaha. Waxaa saldhig u ah aragti xoogan oo muujinaysa naxariis, xiiso, ixtiraam, iyo daneyntra aragtiyaha kale ah. Waxay raadiyaan inay awood siyyaan dadka kale wayna aqbalaan, qadariyaan, u diir-naxaan una naxariistaan dadka kale, gaar ahaan kuwa curyaanka ah iyo kuwa cudurada dhimirka qabo.

**Qalin-jabiyyaal  
rago wanaag iyo  
mustaqbalka ka  
fakaro**



Ardayda qalinjabiya waxay dareemaan rajo ku saabsan mustaqbalooda, oo ay dhiirrigelinayso waayo-aragnimadooda dhabta ah, iyaga oo ka warhaya danahooda xirfadeed, iyo inay helaan aqoonsiyada dhabta ah ee qijimaha leh ee adduunka. Hamiga shakhsi ahaaneed ee ardayga iyo xiisaha waxay udub dhexaad u tahay xirfadaha mustaqbalka iyo himilada iyada oo loo marayo waxbarasho farsamo, layliyo, khibrad shaqo iyo jilayaal, iyo la-talin.

Ardayda waxay qalanjabin doonaan ayagoo leh aqoon iyo qibrad dunida looga baahanyahay laguna tixgaliyo. Qalinjabiyeasha waxaa sidoo kale u diyaarsan qorshooyin qalin-jabinta kadib kuwaas oo ay ka mid yihiin talaabooyinka shaqada lagu raadinayo. Arday kasta oo dhigto dugsiyada sare ee PPS wuxuu leeyahay fursad uu ku kasbado shaqo dhab ah, oo ay ka mid tahay tijaarada iyo ganacsi abuuridda, iyaga oo wax ka baranayo waxqabadyada sahminta xirfadaha sida tababarka mishaarka lagu siinayo, shaqo tusidda, iyo mathalaadda shaqada.

arday kasta. Waxay u horseedi kartaa hoggaamiyeyaasha in ay is waafaqaan hogaaminta, maamulka, baridda iyo barashada, iyo khayraadka si nidaamka waxbarashada uu usoo saaro natijjooyin keenaya balanqaadkii Aratida-fog. Waxyaabaha 9-ka ah ee Tiigsiga qalin-jabiyyaha ah ee xiga waxay ku saleysan yihiin talooyinka bulshada.

## Saameynta raadka ku-reebto Arday waliba

### Saameynta Naqshadaha Aragti-fog ee isku mid ah, Naqshado kala duwan

Waxaa PPS ka go'an in ay arday waliba u hormariso walxaha Tiigsiga qalin-jabiyyaha. Bulshada PPS waxay rabtaa in ay si macquul ah oo firfircoor uga noqoto fursadaha sii kordhaya ee arday waliba. Aaraalda ugu muhiimsan ee ballanqaadkan waa baahida loo qabo in la isku-dhafo fikradda naqshadaynta ee tixgelisa kala duwanaanshaha dadka ee qusayso awoodda, luqadda, dhaqanka, jinsiga, da'da, iyo kala duwanaanshaha kale.

Waqtii xaadirkan, PPS waxay kordhinaysaa tayada shaqada ay la hayso Universal Design for Learning (UDL) si loo helo qaab waxbarasho oo si qas ah u buuxin kara baahida arday waliba ayagoo la eegayo kala duwanaanshaha waxbarashada. Shaqadayada mustaqbalka waxay kordhin doontaa habraacan si loo baahi tiro kala duwanaanta dadka. Habkan shaqo iyo fikir waxa loo yaqaan "Inclusive Design for Learning" (IDL). Sida laga soo xigtay Xarunta Cilmii-baarista ee Inclusive Design Research Centre (IDRC) ee Machadka

Heerka Farsamada ee Ontario (Ontario Art of Art and Design), IDL waa qaab kale ee la yaqaan ee 'UDL' ee la ballaariyay lana kordhiyay. Marka laga reebo in ay siiso ardayda fursad siman oo uu ku guulaysto, IDL waxay sidoo kale isku hawshaa baahida goonida ah ee arday waliba si qibrad nololeedka ardayga ku salaysan loogu naqshadeeyay. Naqshaduna kuma koobno tix galinta kala duwaanshah luuqadda, muuqaalka iyo kala maska furnaanta ee waxay sidoo kale tix galinaysaa kala duwanaanta xagga dhaqanka, jinsiga iyo da'da. Naqshadaan ayaa ka faaiidaysanayso agabyada si fudud loo isticmaali karo si loo dhiso naqshada si qas ulaa tacaalayso baahida ardayga. Naqshadeeyayaasha ayaa mas"ul ka ah in ay ka war hayaan saamaynta ee nidaamka shaqadooda ku yeelan doonto iyo in ay ku dadaalaan in saamayn wanaagsan u yeeshaan ka faaidaystaha loogu talagalay ka dib. Nidaamka naqshadda waa in uu abuuraa ka mid noqosho sidoo kalena gartaa iskuxirnaanta nidaamka iyo isticmaalaha.

Taariikh ahaan, waxbarashada waxaa loo naqshadeeyay si loo buuxiyo baahida arday badan ayadoo la adeegsanayo borograamyo qas ah. Baahida Waxbarashada qaaska ah, Ardada faskaxda furan iyo tayada leh, Ardada Ingiriiska barato, iyo kooxaha dhaqanka goonida ah leh inta badan waxaa xal loogu raadin jiray barnaamijyo gooni ah, Shaqaale Xirfad heersare ah leh, ama istaraatiijiyad xal u raadiyo cajabadaha ay wajahaan ardada qaarkood. Naqshadeeyayaasha Nidaamka waxbarashada gaarka ah waxay ogyihiin in ardaydu kala duwanyihiin. Kala duwanaanta waa asal; Sidaa daraadeed, fikradda helitaanku waxay si ballaaran u faafineysaa baahiyaha kala duwan ee dadka.

Hadafka naqshadeeynta guud (Inclusive Design) ee barashada waa inuu ka faa'iidaysto kala duwanaanshaha dadka ee geedi socodka naqshadeeynta, si loo dhiso khibrando waxbarasho oo

la qabsata, iyo xoojinta, arday kasta oo ka qaybqaato qorshaynta waxbarashadooda. Tiigsiga IDL waa in ay awood u yeeshaan oo ay kor u qaadaan bartayaasha aqoontooda iyo is-go'aamintooda si ay u aqoonsadaan baahidooda waxbarasho ee u gaar ah oo ay u isticmaalaan ikhtiyaarka la heli karo. Hubinta in qaabka naqshadeeynta iyo qalabyada la isticmaalay ay yihiin kuwa guud waa sifooyinka muhiimka ah ee naqshadeeynta guud. Naqshad wanaagsani ma aha inay bartilmaamystaan ardayda dhexe balse sidoo kale in ay bartilmaamystaan ardayda kale. Kooxaha naqshadeeynta guud waa inay kala duwanaadaan, mar kasta oo ay suurtogal tahay, ku dar dadka leh khibradaha nolosha ee la mid ah kuwa "isticmaalaha xad-dhaafka ah" ee kooxdu naqshadeeynta loogu talagalay. Tani waxay u baahan tahay naqshadeeyayaasha barashada in ay helaan wacyi qoto dheer oo ku saabsan macnaha guud iyo saameynta ballaaran ee waxa ay abuurayaan.

### Saamaynta dhisidda Tiigsiga Qalin-jabiyyaha joogtada ah

Tiigsiga qalin-jabiyyaha--aqoonta, xirfadaha, dabeecadaha iyo maskaxda ee dhammaan ardayda ka qalinjebisay PPS ka kororsan doonaan waayo-aragnimadooda barashada-waa yoolka, laakiin Tiigsiga qalin-jabiyyaha wuxuu u baahan yahay in loo qeybiyo qeybo ardayga ku hagi karo waddo guul leh. Muxuu "hoggaamiye sinaan jinsiyadeed (racial equity leader)" ee la barbaarinayo ee fasalka afraad noqraa? Suu u fahansanyahay "ka-warhaynta khaladaadka shakhsiga" canuga ku jira xanaanada caruurga? Maxay " la haanshaha isku-kalsoonni nafsiyadeed" uga dhigantahay ardayga hadda bilaabayso dugsiga sare ee ay la soo darsayaan caqabaha dhalinyaronimo? Kuwani waa qaar ka mid ah su'aalaha aan wax ka qaban doonno si aan u ogaano talooyinka loogu talagalay ardayda iyo dadka qaangaarka ah ee ku taageeraya socdaalkooda.

## Ahmiyadda Macalimka (The Educator Essentials)







## **Maxay Ahmiyadda Macalimka (The Educator Essentials) muhiim u tahay?**

Tiigsiga Qalin-jabiyaha lama gaari karo iyada oo aan la helin taageerada dadka waaweyn ee bulshada oo si ulakac ah u qaabeeyo, u baro, una abuuro xaaladaha ay ardayda u baahan yihiin si ay u guuleystaan. Maxay yihiin sifooyinka-aqoonta, xirfadaha, dabeecadaha, iyo maskaxda- ay dadka waawayn ee degmada iskuulka u baahan yihiin si ay ugu caawiyaan ardayda tiigsiga Qalin-jabiyaha? Sidee ayay uga dhigantahay ka caawinta ardada hawlaho iyo casharsiinta tooska ah?


Degmo dugsiyeedku waa bulsho dadka waaweyn ah oo u taageero barashada ardayda siyaabo kala duwan. Sababtan awgeed, qof walba oo ka shaqeeya PPS waa baraha sida ku cad muuqaalka aragtidan-fog. Degmadu waxay taageeri kartaa oo kobcin kartaa sifooyinka dadka waaweyn oo ka shaqeeya nidaamka. Sida caadiga ah, dadka kalee waaweyn ee ku lug leh waxbarashada ardayda-qoysaska(barayaasha kowaad ee ilmaha), ama shaqaalaho ururada lammaanaha, tusaale ahaan-waxay sidoo kale u arki doonaan sifooyinkaan kuwa waxtar leh marka ay taageerayaan ardayda waxayna kaashan karaan degmada si loo abuuro siyaabo ku habboon dhiiri-galinta horumarkan.

## **Waa Maxay Ahmiyadda Macalimka (The Educator Essentials)?**

Ahmiyadda Macalinka waxaa laga soo xulaa talooyinka bulshada guud ee quseeyo aqoonta, xirfadda, fikir-maskaxeedka, aqlaaqda looga baahanyahay dadka waaweyn in ku caawiyaan Tiigsiga Qalin-jabiyaha. Ahmiyadda Macalimka waxaa ku jira aqoon iyo xirfad shaqo, oo ay weheliyaan dhinacyada xidhiidhinta aadanaha ee iskaashiga, taageerada, iyo baridda iyo barashada. Ayagoo aad u yaqaan cilmi balaaran, ayay hadana macaliminta PPS ogiyihin in dadaalka sida wadajirka looga baahanyahay si arday waliba ayagoo qaadanayo mas'uulyadda la socoto doorkooga ka ku leeyihiin Isbeddelka Nidaamka waxbarashada.

Qiyaasta ma aha in dadka waaweyni ay si toos ah u yeelan doonaan dhammaan sifooyinkaas. Waxaa lagu taageeri doonaa inay horumariyaan waxyabaha muhiimka ah ama la kiraysto haddii ay ka go'an tahay inay ku kobciyaan. Tani waa aragti muddo dheer ah; horumarinta iyo mudnaysiinta sifooyinkaasi waxay qayb ka noqon doontaa istaraatijiyadda degmada ee barashada xirfadlaha. Kartida Macallinka u leeyahay in uu dhiso oo abuuro sifooyinkaan ayaan muhiim u noqon doonto caawinta ardada.

Sifooyinka waxay sidoo kale ka caawin doonaan barayaashu in ay midba midka kale taageeraan isla markaana abuuraan xiriiryo wax ku ool u ah bulshada oo taageera waxbarashada ardayda iyo kasbashada xirfadaha. Ku-daridooda Ahmiyadda Macalinka waxay xoogga saartaa in PPS diiradda saarto adkeysiga qiirada bulshada iyo sinnaanta, iyo sidoo kale aqoonsanayaa kaalinta muhiimka ah iyo kaalinta dhexe ee barayaashu ku leeyihiin horumarinta caafimaadka ardayga.



**Kuwa wax  
joogteeyo  
lana isku  
halayn karo**




Dadka Qaan-gaarka ah ee PPS waxaa aamin, la isku halayn karo, geesinimana leh. Qof waliba wuu waji-furanyahay waana dad ay dhamaan ardada, xubnaha qoyska, iyo saaxiibadaba ay isku halaynkaraan sababtoo ah waxay si joogto ah u ilaaliyaan waajibaadkooga ayagoo isla-xisaabtama. Waxay leeyihiin rajooyin joogto ah iyo heerar diyargarow si ay diyaar ugu ahaadaan in ay ka jawaabaan baahida ardaydooda.

**Kuwa Aqoon leh  
una heelan aqoon  
kororsi joogto ah**




Dadka waaweyn ee PPS waxay ku fiican yihiin meelaha ay ka shaqeeyaan. Kuwa ku hawlan waxbarashada waxay sidoo kale xirfad u leeyihiin noocyoo kala duwan oo tijaabo ku salaysan, oo ay ka mid yihiin istaraatijiyyada dareenka bulsho ahaaneed, dhaqan-tixgelinta xilliga waxbarashada. Dadka waaweyni waxay si firfircoon uga shaqeeyaan sidii ay u sii wadi lahaayeen aqoontoodii xirfadeed iyo weliba xitaa saadaalinta isbeddelada mustaqbalka ee ku aaddan xirfadooda, waxayna ka qayb qaadanayaan casriyeynta iyo hababka ugu fiican ee lagu tayeeyo iskuuladooda iyo waaxyadooda. Waxay u heellan yihiin inay isticmaalaan qalab kala duwan, oo ay ka mid yihiin tiknoolajiyada hadda jira iyo kuwa soo baxaya iyo xogta si loo ogadoo hagaajinta joogtada ah ee shaqada, iskaashi la leh saaxiibada dhammaan nidaamka, iyo inay taageeraan ardayda kala duwan.

**Kuwa U dhuun-  
duleelo  
Sinaanta Jinsiga  
iyo Caddaaladda  
Bulshada**



Dadka waaweyn ee PPS waxay si geesinimo leh wakiil ooga yihiin isbbedelka waxayna si firfircoon u kor oogu qaadaan hubiyaanna sinnaanta jinsiga iyo cadaaladda bulshada. Waxay fahamsan yihiin in xaqiiqo la rumaysan yahay oo ku salansantahay dhaqanka loo badanyahay ee badanaana laga saaray aragtida dadka midabka leh. Waxay fahamsan yihiin in ay ku beddeli karaan fahamka qaldan habab dhaqamada guud ah oo loo dhan yahay saxna ah oo gacan ka geysta horumarinta aqoonsiga wanaagsan ee dadka waaweyn iyo ardayda midabka leh.

Waxay hubiyaan in ay si siman u helaan waxbarashada ardayda oo dhan iyo hababka kala duwan ee waxbarashada iyadoo la adeegsanayo sinaanta jinsiyadeed iyo hab-raacku salaysan caddaaladda, iyo lina tixgalinayo dhaqanka iyo luuqada loo adeegsanayo aqabka iyo manhajka waxbarashada. Waxay abuuraan bulshooyin waxbarashada ku amaan tahay qiimeeyo kala-duwanaanta waaxahooga, iskuuladooda iyo fasaladooda. Waxay horumariyaan istiraatijiyyado khalkhal galinaya qaababka la saadaaliyo ee waxqabadka ee ku saleysan cunsurnimada. Waxay ka warqabaan qaladaadkooga gaarka ah waxayna ku dadaalaan sidii ay u sixi lahaayeen.








**Kuwa Soo  
dhaweyn leh una  
dhaga-nugul  
ardayda kala  
duwan**




Dadka qaangaarka ah ee PPS waxay ixtiraamaan, fahmaan, ayna la qabsadaan dhaqanka, luqadda, iyo baahida gaarka ah ee ardaydeena kala duwan. Dadka waawayni waxay ka fekerayaan cidda ay ardaydeena yihiin oo ay ka warqabaan baahida gaarka ah ee ardayda marka ay qorsheynayaan shaqadooda qabsanayaan maalin kasta. Maskaxdooda ayay ka dhaadhiciyaan in ardaydooda ay leeyihii awood ay ku koraan kuna hormaraan ee aynan taagnaan. Waxay si aad ah u yaqaanaan dhaqamada kala duwan, oo ay weheliso xeelado waxbarasho oo wax ku ool ah lehna dhaqan iyo luqad ahaanba. Dadka waawayni waxay u arkaan kala duwanaanshahooda gaarka ah iyo tan ardayda iyo qoysaskeena sida wanaag taageerayo waxbarashada iyo barako kobcinayso dhaqanka degmada iyo bulshada.

**Kuwa Ka fikiro  
bulshada, xiriir  
sameeyo, wada  
shaqeeyna leh**



Dadka waawayn ee PPS way fahmaan, ixtiraamaan, ayna qadariyaan bulshada ay u adeegaan. Waxay xiriirkha qoto dheer la abuuraan ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada. Waxay yihiin dad wada shaqeynaya, oo raba in ay gaaraan meel ka baxsan ilaha dugsiga oo ay ku xirmaan xubnaha bulshada ee ardayda iyo midba midka kale. Waxay doorkooga ka qaataan hawlahaa wadajir, waana hogaamiyayaal hadana adeecid leh, garasho u leh baahida diyaarna u ah in ay wax ka qabtaan. Waxay si joogto ah u raadsaan xulafo iyo bah-wadaag si ay ardada ooga caawiyaan helista natijo wanaagsan. Waxay aaminsanyihiin in "talada kaa maqan ay walaalkaa ku jirto." <sup>1</sup>

**Kuwa Iska  
warhaya islana  
xisaabtama**



Dadka waawyn ee PPS si iska-warqab iyo aqoon ku dhisan bay ooga warhayaan qaladaadkooga iyo awoodooda, wanaag bayna ka aaminsayihiin qofnimadooda. Waxay dib-u-eegis ku sameeyaan aqoon kororsigooga, taa oo u suura-galinayso si joogta ah in ay tiigsadaan horumar iyo aqoon kororsi. Waxay nuglaanshaha u arkaan awood, waxay u furan yihiin jawaab celin laga helo asxaabta iyo mentorska, waxayna dhaga-furan dareenka bulshada, taa oo awood u siiso inay ardayda, qoysaska, iyo dadka kale u abuuraan goobo nabadgelyo leh ee.

**Kuwa Hal-abuur  
leh, Caalamka ka  
warhayo, Maskax  
furanna leh**



Dadka waaweyn ee PPS waa hogamiyayaal inay runta ogaadaan jecel mustaqbalkana tiigsado. Waxay fahamsanyihiin qaabab hogamineed ee kala duwan kana kala yimid dhaqamo kala duwan waxayna diyaar u yihiin qabashada "xil waliba." Wuxuu qoysaskaa in ay isku dheelitiraan khatarta iyo natiijoojinka. Waxay awood u leeyihiin inay u fakaraan si maxalli iy caalami ahba labadaba si ay ula shaqeeyaan dadka kale si wax looga qabto caqabadaha. Iyaga oo ay weheliyaan wadashaqayntan, waxay u dejiyaan hanuunin caalami ah oo ardayda loogu talagalay iyaga oo ku hadlaya in ka badan hal luqad iyo aqonta dhaqamada kale.

**Kuwa Naxariis leh,  
Diir-naxo, lala-  
dhaqmi karana**



Dadka waaweyn ee PPS waxay muujinayaan daryeelka ardayda iyo qoysaska waxaanay ku faraxsan yihiin dhisidda xidhiidhada shakhsii ahaaneed. Waxay eegaan xaga kartida (garashada iyo dhiirigelinta kartida halkii ay xooga saari lahaayeen dhibka kaliya) ee qof walba oo ku sugaran PPS oo si gaar ah u fiirsada baahida ardayda ugu nugul. Waxay u heellan yihiin fulinta istaraatiijyoojinka lagu horumarinayo iyo/ama lagu taageerayo arday kasta xirfadhiisa iyo kartidiisa. Waxay dhiirigeliyaan barashada waxayna diyaar u yihiin awoodna u leeyihiin in ay fududeeyaan wadahadalo adag ee muujinayo u diir-nixidda ardayga iyo waayo-aragnimada balaaran ee qoysaska.

**Kuwa isbeddelka  
la qabsado,  
Dhabar-agdayg leh,  
Isbeddel doonna  
ah**



Dadka qaangaarka ah ee PPS waxay sharfaan dhaqanka iyo caadooyinka ayagoo u furfuran isbedel. Qof kastaa wuxuu taageeraa furfurnaantan iyadoo la fahamsanyahay in fashilka, isku dayga badan, iyo ku celcelinta lagama maarmaan u tahay joogtayta waxbarashada, haddayna muhiim u ahayn. Waxay muujiyaan u heelanaanta wanaajinta ayagoo dhisayo xirfadda iyo hawl-joogtaynta si loo badalo nidaamka iyo qaab-dhismeedka ku weegaarsan marka loo baahdo isla markaana ardayda, macalimiinta iyo kuwa kaleba ku xoojinayo dhabar-adaygooga is-daryeelid, iyo wada shaqaynta.

## **Saameynta**

Ahmiyadda Macalinka waxay quseysaa qaan-gaar waliba ee ka shaqeeyo PPS. Waxay xog-ogaal u yihiin sida aaraa'da qof waliba oo weyn ay raad-reeb ugu yaalato ardayda--si toos ah ama dadban--sidaa awgeed ay saameyso guusha ardayda. Si loo helo dadka weeweyn ee bulshada oo isku hadaf ah, iskuulka degmada wuxuu u heellan in uu gacan ka geysto si qaan-gaar waliba ee PPS u fahmi lahaa doorkooga kaga aadan waxbarashada ardayga, si qof waliba uu oogu dabaqo Ahmiyadda Macalinka shaqadooda iyo aqlaaqdooda.

Wada shaqeyntu sidoo kale waxaa lala samayn karaa waalidiinta iyo qoysaska si ay uga caawiso inay xoojiyaan doorarkooda saa waa macallimiinta koowaad ee carruurta. Tusaale ahaan, See Ahmiyadda Macalimka loogu isticmaali karaa barbaarinta Ilmaha? Sidee degmada iyo saaxiibada bulshada ay ku caawin karaan qoysaska in ay baaraan codsigan, ayadoo tusaale ahaan, la adeegsanayo seminaaro ama buug-yare?

## Isbeddelka Nidaamka Waxbarashada



**PAWFECT**

TEAMWORK

# **Waa maxay Isbeddelada Nidaamka Waxbarashada?**

Isbeddelada Nidaamka Waxbarashada waa isbeddelo ka tarjumayo ahmiyadda ururka iyo sida ay u shaqayso. Waxay quusaysaa dhammaan ururka, laga bilaabo iskuulada ilaa waaxyada xafiisyada dhexe. Waxay abuuraan xaalado taageera oo dhiirigeliya dadka waaweyn si ay ooga tusaalo qaataan ahmiyadda Macalimka ardadana ay ugaaran Tiigsiga Qalin-jabiyaha.

Iyada oo qayb ka ah aragtida muddada dheer ee degmada, isbedeladaan hal mar kuma eko. Marka la eego baaxadda, isdaba-joogga, iyo isku-dhafka (inta aan sameyno, sida ay u kala horeeyaan, iyo isbedelada laga yaabo in ay wada shaqeyn karaan ama la iskaga maarmi karo) qayb ka mid ah shaqada qorshaynta istaraatijiyadeed ayaa go'aamin doonta mudnaanta iyo ku-tiirsanaanta. Tusaale ahaan, dhisidda nidaam ku salaysan sinaan jinsiyadeed iyo qaab-dhismeed taageerayo shaqaalaysiinta shaqaale kala jinsi ah. Isbedelkaan ayaa kadibna taageeri doono hormarin dheeraad ah ee sinnaanta jinsiyadda. Waxaa isbeddalay isticmaalka wakhtiga iyo firaaqada si loo kobciyo barashada shaqsiyadeed ee keeni karo horumarka fursadaha, tanna waxay caawinaysaa wanaag u isticmaalka wakhtiga.

Dib-u-cusboonaysiinta nidaamka iskuulka ayaa u wanaagin doono xaaladda waxbarsho ee ardada iyo dadka waaweyn kaa oo ku sababi doono natiijo wanaagsan in ay helaan ardada PPS.





## 11-ka Isbeddel

(Wareeg-Saacadeed)

Degmo iskuuleed Isku-xiran  
Isbeddelna leh

Si tixgalin  
leh oo taageeridda aradda  
naafada ah hab-raac loo  
dhanyahay  
Dib-u-eegidda waqtiga iyo  
goobta si loo helo waxbarasho  
shaqsiyadeed

Nidaam iyo qaab-dhismeed  
taabacsan Sinaanta jinsiyadaha

Abuuridda Nidaam guud ee  
waxbarasho ee shaqaalaha kala  
duwan

U isticmaalidda Iskuulaha  
goobo bulshadeed

Tacliimin iyo Manhaj  
Isbeddel leh

Taageeridda wakiilada dunida  
iyo danjireyaasha

Dhaqan ku dhisan badbaadada  
jirka iyo dareenbka

Waxbarasho ay u  
dhanyihiin aradda iyo dadka  
qaan-gaarka ah,  
Sinaanna ku dhisan

Mustaqbal ku biisan  
deegaanka, caqli-galna ah



PPS waa degmo dugsiyeed loo simanyahay diiraddana saarayso ardayda, u-dhaga-nugul baahida ardada, si firfircoon uga shaqeynaya horumar joogto ah. Waxay leedahay aragti cad oo qeexan, oo leh qorshooyin istaraatiijiyadeed oo ku haboon oo la cusbooneeysiya dhawrkii sanabo mar. Dhaqanka degmada ee hagaajinta joogtada ah ayaa u oggolaaday inay ka sii fikirto oo la qabsato isbedelka.

Waxay adeegsataa isku-dhfafka hab-raaca dib u soo celinta cadaaladda si loo taageero bogsashada iyo cusboonaysiinta iyo in la horumariyo xalka iyada oo la siiwadayo qorshe hawleedka. Shaqaalaha waxaa loo xilsaaray in ay fuliyaan Ujeedka iyo hadafka iskuulka degmada iyo shaqeeyta qaybaha guud ahaanba si ay u taageeraan waxqabada, kalsoonida, iyo hal-abuurka. Shaqaalaha Iskuulka degmada waxay ka shaqeeyaan si ay u horumariyan wada shaqeeynta asxaabta, qoysaska, iyo bulshada kala duwan ee Portland.




**Si tixgalin leh oogu  
taageeridda ardada naafada  
ah hab-raac  
loo dhanyahay**



Hab-raaca iyo caadada wadajirka guud ee PPS waxay hubisaa in ardada naafada ah iyo macalimiinta taageero ay helaan waxa ay u baahanyihiin si ay u gaaran Tiigsiga qalin-jabiyyaha iyo Ahmiyadda Macalinka. Wadajirka waa mas'uuliyadda qof walba, qoysaska iyo shaqaalaha Iskuulka degmada waa in ay wada shaqeeyaan si ay u bartaan, oogu doodaan, una taageeraan ardada maskaxda jirkaba ka caqabadaysan. Macallin kasta waxaa la siyyaa tababar xirfadeed iyo ilaha loo baahan yahay si loo fududeeyo fursadaha ardayda naafada ah inay ku guuleystaan. Ardayda PPS waxay aqoon u yeeshaan naafanimada ayagoo da 'yar, taas oo horseedi karta wacyi galin kordhin iyo hoos u dhac ku yimaada midabtakoorka iyo takoorida kuwaas oo horseedi kara dhibaateyn iyo booc-boocsi.

Taageerada tacliinta waxay muujinaysaa nidaamyo taageero oo badan oo isku-dubbaridan (MTSS), oo ah isku xirnaanta nidaamyada lagama maarmaanka u ah dhammaan waxbarashada ardayga, dabeecadda, iyo guusha bulshada. Waxbarashada gaarka ah ee nidaamka taageerada isku dhafan ayaa horseedaya horumarka barashada shakhsiyeed ee dhammaan dadka, kuwaas oo ay ku jiraan isdhexgalka luqadda guriga, tiknoolijiyada caawimaadda, iyo taageerida bulshada iyo dareenka bani'aadannimo


**Dib-u-eegidda waqtiga iyo  
goobta si loo helo  
waxbarasho shaqsiyadeed**



Sanadkii 2019, bulshada PPS waxay dejisay hadafkii lagu dayactiri lahaa qaabkii hore ee goorta iyo goobta ay joogteynayaan iyo natijjooyinka barashada ardaydu way kala duwan yihiin. Sababta isbeddelka loo samaynayo waxay tahay in dib loo baaro waxa laga aaminsanaa wakhtiga iyo goobta, iyo in la isticmaalo qaabab iyo agabyo kale duwan ee u siin kara ardayda xuriyad balaaran goorta iyo goobta ay waxbarashada. Aradda hadda goobta iyo goorta ay rabaan bay waxbaran karaan. Sidan waxay meesha ka saaraysaa xanibaadda goorta iyo goobta iskuulka la dhiganayo waxayna suuro galinaysaa fursado badan in la helo.

Xoriyadda wakhtiga waxay ardayga siinaysaa in doogyo badan oo ay ku buuxin karaan shuruudaha Tiigsiga Qalin-jabiyyaha. Ardayda PPS waxay tilmaamaan ujeedooyinka waxbarashada shakhs ahaaneed, waxayna leeyihiin waqtii ay ku daba galaan danaha shakhs ahaaneed waxayna ka shaqeeyaan mashaariicda shakhs ahaaneed, si ay u helaan waayo-aragnimo siyaabo badan oo waxbarasho ah. Tusaale ahaan, ardayda waxay u shaqeeyaan shakhsiyad iyo kooxo, fasalkooga iyo fasalada kaleba. Waxay sidoo kale ka shaqeeyaan barashada mashruuca-kusaleysan, gudaha iyo dibadda fasalkaba, ayagoo la shaqeynayo bulshada iyo saaxiibada adduunka. Caawimaad waxbarasho ayay heli karaan ardada saacadaha aynan jirin casharada, ayadoo la isticmaalayo qaabab iyo qalabyo kala duwan. Codka, qaababka muuqda, qoraalka, fiidiyow, cayaaro, iyo tiknolijiyadda cusub, tusaale ahaan, waxay u sahlaan in ay ardayda u gudbiyaan dareenkooga si onlayn ah, si maxali ah ama caalami ah. Mar xaladahaan ayaa sabab u noqdo in ardaydu ay jecladaan waxbarashada. Waxay ogaadaan istiraatiijiyadaha iyo qaababka u fiican iyaga, taasina waxay taageertaa waxbarashadooda nololeed.


## Nidaam iyo Qaab-dhismeed taabacsan Sinaanta jinsiyadaha



Sinaanta jinsiyadaha iyo cadaaladda bulshada ayaa tiir-dhexaad u ah go'aamada iyo ficiilada PPS, waxayna ka shaqeysaa baabi'inta caqabada cunsurinimada ee hortaagan helidda fursadaha. Hadafka ugu muhiimsan ee Aratida-fog ee iskuulka degmada waa baabi'inta natijjada lagu saleeyay cunsurinimada. Isbeddelo dhawr ah ayaa taabo-galinayo hadafkaan. Isku-xiridda nidaamyada iyo qaab-dhismeedka lagu taageero yaboohyada sinaanta jinsiyadaha si loo dhiso ficio dhaqamada waaafaqsan, oo ay ka mid tahay miisaaniyad siman, si loo hubiyo taageerada loo jaangooyo iskuulada iyo, ugu-dambayntii aradada. Isbeddelkaan waxaa daba-joogo isla-xisaabtan iyo hawlo dib-u-eegis lagu sameeyo saamaynta iyo ula-jeedada.

In kasta oo isbedelkani uu keeno jinsiyadda, habka hagaajinta nidaamka iyo qaab-dhismeedku waxay taageeri doonaan kala-duwanaanta kala duwan sida aqoonsiga iyo waayo-aragnimada, taariikhda, iyo aragtiyihii inaga midkeennu hayo, oo ay ku jiraan naafonimada, martabadda, jinsiga iyo jihada galmaada.

## Abuuridda Nidaam guud ee waxbarsho ee shaqaalaha kala duwan



PPS waxay ku dadaaleysaa xoog shaqaale tayo sare leh oo ka tarjumaya kala duwanaanta bulshada ballaaran waxayna dhiirigelisa dhaqanka barashada, koritaanka, iyo horumarinta. Shaqaalahayaga iyo barayaashu way ka warhayaan dhaqamada. Shaqaalahanaaga iyo macalimiinteenaa waxay tix-geliyaan dhaqamada. Iuuqad dhaqan wanaag ku salaysan ayaa laga hirgeliyay degmada, si loo dhiiri geliyo jawi soo dhaweyn leh. Iskuulka degmada sidoo kale wuxuu hirgeliyay qaabab si sinnaan ah lagu shaqalaysiinayo wuxuuna dajiyay barnaamijyo loogu talagalay xirfadaha horay loo gacan-bidixayn jiray.

Waxaan dadkayaga ka caawin doonaa inay buuxiyaan Ahmiyadda Macalimka iyadoo la adeegsanayo horumarin xirfadeed oo si qoto-dheer loo dhisay, nidaam balaaran, fursadana leh, qaab iyo mug ahaan qaas ah. Tani waxaa ka mid ah is-hajjid, onlayn ah, iyo fursado had iyo jeer la heli karo. Waa wax macno leh, waxqaban kara, oo diiradda saaraya taageerada ama kor u qaadista waxqabadka iyo adeegyada taageerada. Ficil kasta ama fursadda waxbarsho ee qof kasta oo qaangaar ah ee ku jira nidaamka wuxuu muujin karaa si cad oo loo marayo guusha ardayga. PPS waa goob shaqo oo abaal-marin leh oo bixisa ilaha si ay u taageeraan samaqabka iyo guusha shakhsii ahaaneed iyo mid farsamo.


## U isticmaalidda Iskuulaha goobo bulshadeed



Dugsiyadu waxay noqdeen goobo bulsho oo isku xira adeegyada taageerada ee qoysaska - oo ay ku jiraan daryeelka caafimaadka, kaalmada guriyeynta, dharka, iyo cuntada- kuwaas oo ah mid miro dhal ah, sahlan, baahida bulshadana ay keentay. Adeegyadan taageerada waxaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu caawiyo ardayda ku jirta marxaladaha kala-guurka muhiimka-- xanaanada, fasalka lixaad, fasalka sagaalaad, iyo fasalka laba iyotobnaad/Ka-gudbidda dugsiga sare, iyo marka ardaydu ay cusubiyihin ama u kala guuraan dugsiyada kale--taa oo ardayda u abuurayso saldhig qaas ah oo ay kula falgalaan waxbarshadooda.

Barashadu waxay ku saleysantahay asalka qoysaska iyo wanaag dhaqameedka si ay u dhistaan bulsho dugsiyed si looga caawiyo ardayda inay gaaraan kartidooda aqooneed ee ugu sarreyya. Iskuulka degmadu wuxuu dhisaa isku xirnaanta, goobaha degmadana waxay taageeraan isdhexgalinka iyo iskaashiga lala yeesho wada-hawlgalayaasha bulshada.

## Tacliimin iyo Manhaj Isbeddel leh



Waxbarashada iyo manhajka PPS waxaa ku dhafan tixgelinta ixtiraamka leh ee dhaqanka, naafada, jinsiga iyo luuqadda. Manhajka wuxuu ku salaysanyahay heer, dhaqankaiyo luuqadana wuu tixgeliya. Arday waliba wuxuu haystaa taageero, fursado waxbarasho ee siman ee uu ku dhiso aasaaska shuruudaha looga baahanyahay waxbarasho tayo leh. Arday kastaa wuxuu heli karaa qaybahaa kala duwan ee taageerada iyo dardargelinta haddii loo baahanyahay.

Ardayda waxaa la siiyaa fursado loogu talagalay barashada shakhsii ahaaneed iyo horumarinta xirfadaha xallinta dhibaatooyinka iyaga oo ula-kac ah loogu hawlayso. Si fudud ayaa loo muujiyay todobada xirfadood iyo istaratiijiyad ee aqoon kororsiga joogtada ah (wada-shaqey, Fikir-dheeri, hal-abuur, wada-xiriir, shaqsiyad, wadaniyad, iyo isticmaalka wanaagga compuyutarka). Bariida iyo barashada way is-dhexgaleen-ardada iyo dadka waaweyn waxay ka wada shaqeyn karaan maadooyin kala duwan, taa oo ka sahlayso xiriirkha dhibkana siyaabo badan loo xaliyo. Marka lagu daro akhris-qoraalka aasaasiga ah iyo aqoonta, fahamka muhiimka ah ee jinsiyada iyo dhaqdhaqaqa ku saabsan isbeddelka cimilada ayaa noqdey meelo badan oo ka mid ah barashada. Qalin-jabinta ka hor ardada waxaa waajib ku ah aqoon kororsi ay ka helaan shaqo dhab ah sida tababar dheer iyo mid gaaban, shaqo tusid iyo shaqo jiliid.

## Taageeridda wakiilada dunida iyo danjireyaasha



PPS waxay ka taageertaa qalinjebiyayaasha inay noqdaan wakiillada caalamiga ah iyo danjireyaasha iyada oo hubinaysa in macalimiinta ay noqdaan kala duwan caalamina ah kuwaan ka tarjumayo kala duwanaanta ardayda tixgaliyana kala ahaanshaha luuqadaha. Macalimiintan waxay ka tarjumayaan tix-gelinta iyo warhaynta caalamka; taariikhda waxay ardada u baraan wajijo kala duwan ayagoo xoogga saarayo taariikda caalamka iyo qowmiyadaha; waxay cilmi u leeyihii arrimaha cimilada; waana mas'uuliyiin deegaanka u doodo



## Dhaqan ku dhisan badbaadada jirka iyo dareenbka



PPS waxay abuurtay dhaqan ku slaysan amniga iyo is-ixtiraamka ardayda iyo dadka waaweyn. Bulshada, dareenka, iyo fayoobaanta jireed waxay muhiim u tahay guusha tacliinta iyo xirfadda. Arday kastaa wuxuu ogyahay in uu jiro qof weyn oo xannaaneeyo oo ay la hadli karaan iyo nidaam guud ee dhowro dareenkooga oo ay ku kalsoonaan karaan. Dhammaan dadka waaweyn ee iskuulka degmada ayaa la siiyaa tababar xirfaddeed iyo talooyin ah maamilidda dareenka shucuurda. Sidan ayay dadka qaan-gaarka naftooda iyo kuwa kaleba isku caawin karaan ayagoo muujinayo muhiimahadda badbaadada jirka iyo shucurta, sidaana tusaale wanaagsan ugu noqonayo ardada.

Si loo abuuro xaaladahaan, Iskuulka degmada wuxuu go'aansaday in uu ugu gudbo isbeddel firfircooni. Ardada iyo dadka waaweyn waxay yeeshen qeexitaan cad ee sida nabdoonka jirka iyo dareenka ay u yeelato saamayn iyadoo la aqoonsanayo qaababka loo cabiri karo. Waxaa jira manhajka Pre-K-12 ee iskuul waliba raaco, dhammaan dadka waaweyn ee nidaamka ay leeyihii xirfad ka caawiso fahamka dhismaha dareenka bulshada iyo istaratiijiyadda ku haboon doorkooga, Sidan u wajahidda waxay baraysaa ardayda sida ay ula qabsan karaan walaaca iyo dhibaatada waxayna dadka waaweyn siinaysaa qalab lagu taageerayo ardayda iyo naftooda. Degmada dugsi ayaa sidoo kale samaysay "nidaam digniin hore ah" si loo caawiyoo qof walba inuu fahmo waxyabaha keena khatarta, aqoonsado ardayda dhibaatada ku jira, iyo ka hor-tagidda.



**Mustaqbal ku  
biisan  
deegaanka,  
caqli-galna ah**



Qorshayaasha iyo go'aammada ku saabsan jawiga jireed waxaa aas-aas u ah laba aragtiyo muhiim ah: sinnaanta iyo ka fakarka mustaqbalka. Wadajir ahaan, aragtiyahan waxay kor u qaadaan horumarinta goobo caafimaad leh, xoriyad leh, qof waliba wax ka baran karo.

Tixgelinta sinnaanta ayaa saldhig u ah go'aamada laga qaadanayo sida loo isticmaalo fursadaha iyo khayraadka. Tani waxay hubisaa in si siman loo wada helo qalabka dijitalka ah iyo tiknoolijiyada, tusaale ahaan. Ka sii fikiridda mustaqbal waxay sahashaa qorsha samayn ka sii baaraan dago waxa soo socdo oo aan la hambabarin. Nidaam xooggan, hadaf-dheer iyo istiraatijiyyad ku salaysan dayactir iyo casriyayn ayaa bedelay fikirka habacsanaanti. Qaab furfuran aanse ahayn hadaf-gaaban ayaa badalay u isticmaallida khayraadka waxbarshada si isku-dhexyaac ah waxayna badali kartaa habraaca wanaagsan ee waxbarshada.

**Waxbarasho ay u  
dhanyihiin aradada  
iyo dadka qan-  
gaarka ah, Sinaanna  
ku dhisan**



Fikirka ah in maskaxda la kobcin karo--oo qofka aqoontiisa iyo xirfadiisa aynan xaddidnayn, balse si joogta ah loo horumarin karo, ayaa ku xididaysatay PPS. Ardaydu waxay heli caawimaad u qas ah sida ku cad Isbeddelka Nidaamka waxbarshada ee "habraaca tixgelinta leh ee loo dhanyahay." Barayaashu waxay helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay u caawiyaan xaqiijinta guusha ardayga waxaana lagu xisaabtamiyi doonaa guushaas. Marka lagu daro wax-baridda, iskla xisaabtanku waxa ka mid ah xiriirka macalinka-ardayga waxaana muujinaya sahan dhamaystiran oo ay ku jirto talooyinka ardayda, qoyska, iyo maamulka.

Dadka waaweyni waxay wadaagaan oo muujiyaan mabda'a asaasiga ah ee PPS. Waxay dhamaan aradu ku biiriyaan hab ku salaysan karti iyo asalka dhaqankoooga, qasatan ardada ka soo jeedo bulshooyinka taakhiiriyan la gacan-bidixeeyo. Macalimiinta waxa lagu dhgiiri galiyaa in ay taageeraan, oo aynan cadaadin, iyo in ay qaabeeyaan oo ay ka caawiyaan ardaydu inay kala soocaan qofkasta wixii fikrado ah ee ay muujin karaan.

## Saameynta

Nidaamayadu way adagyihii in la badalo. Waa kuwo adag, oo leh qaybo badan oo isku xiran, iyo caqiidooyinka waxay u muuqdaan inay noqdaan kuwo isku dhfan sida qaababka iyo geedi socodka. Kuwa ka faa'iidaysta nidaamyada waxay badanaa leeyihiin awood ay ku dhex jiraan oo si firfircooni u diidaan isbeddelada. Sidaa daraadeed, samaynta isbeddello waxay u baahantahay adkaysi, aqbalaad balaaran, hab-raac sii wanaajin joogto ah, muujinta heelanaan ah in arday waliba ee nidaamka iskuulka loo adeego.

Dadaalka joogtada ah ee Aragtida-fog ee degmada, sida is-daba joogga ahna loo bayaaniyo iyadoo loogu adeegsanayo kala-mudnaynta qorshaha iyo ficiilada lana taageerayo dadaalada hal-abu rka leh, ayaa gacan ka gaysan doonta muujinta muhiimadda ay leedahay in la gaaro rabitaanka guud.

Isgaadhsiin joogta ah oo hufan, oo ay weheliyaan fursado iskaashi ee dhammaan waaxaha PPS iyo goobaha, qoysaska, iyo bulshada, waxay taageertaa ogolaanshaha iyo lahaanshaha la wadaago maaddaama isbedelku noqdo walaaca iyo masuuliyada qof walbo.

Isbeddel balaaran oo dagdag ah oo lagu badalayo xaaladda hadda taagan wuxuu inta badan keeni karaa macaardonimo aynan dan oogu jirin dhammaan ardana. Si kastaba ha noqotee, iyadoo la adeegsanayo geeddi-socodka ku-meel-gaadhka ah oo ay ka mid yihiin dib-isu-eegidda, sida tijaabinta iyo hagaajinta joogtada ah, waxay gacan ka geysataa inay abuuraan guulo isdaba-marin ah, oo sidaas darteed, falcelin yar, abuurista boos iyo waqtii ay wax ooga bartaan hab-raaca.

# Mustaqbalka PPS

Tani waa Aragti hadaf-dheer ah. Hawsha mira dhalka leh dagdag bay ku bilaabataa, laakiin natijjada waxay qaadan waqtii iyo qorshayaal istiraatiji ah. Ugu dambeyntii, Aragtidi waxay diyaarin doontaa ardayda ka qalin-jabisa PPS si adduunyo isbeddel leh-oo ay ku jiraan shaqooyinka aan welli la soo saarin-ayna u qalabaysnaadaan inay noqdaan kuwo xirfad leh oo ku shaqeeya isbedel. Samaynta nidaam isbaddaleedka loo baahanyahay waxay qaadaan qorsha istaraatijiyadeed oo aad looga fakaro, iyo qaabaynta ahmiyadda macalimka oo ay ka dhigantahay in taago oo fursadaha barashada xirfadaha la abuuro.

Ardayda ka qalinjebiso PPS waxay awoodi doonaan inay la tartamaan xoog shaqaale caalami ah- ha ahaato gudaha ama dibedda-sababtoo ah waxay leeyihiin aqoon iyo xirfad aasaasi ah, oo ay ku jiraan culeysyo kala duwan oo lagu xalinayo iyo xirfado waxbarasho oo soconaya. Waxay sidoo kale la imaan wadashaqeyn wanaag xirfadeed iyo karti lagula xaajoodo dadka kale ayagoo ilaalinayo kala duwanaanta.

Qeybaha hoos ku qoran ayaa ah tusaalooyin yar oo ka mid ah siyaabaha ay u ekaan karto dib-u-casriyaynta Portland Schools. Fikirada kale wax agu wadaagay websaytka waxaad ka daalacan kartaa bogga Aragtida-fog ee websaytka www. pps.net/visioning, iyo hababka "Future" (eeg lifaaqa). Sanadka bilowga ah ee laga shaqeynayo Aragti-fog, way adagtahay in la arko mira dhalka dadaalka la sameeyay, waxaa wanaagsan in la abuuro saansaan iyo tusaalayn mustaqbalka ah si loo sii wado diirad sii saaridda waxa soo socdo iyo waxa a samayn karo. Kuwani waxay noqon doonaan waqtiyada muhiimka ah, dhacdooyinka ugu muhiimsan, iyo sambalada tiigsiga ardayga qalin-jabiyaha ah ee aan doonayno in aan wanaajinno.

Aan bal tusaalaysanno dhawr sambal ee sanadka 2030...

## Taaliah

Taaliah waxay isu diyaarinaysaa sanadki ugu dambeeyay ee waxbarshadeeda. Inta udhaxeysa waxbarashada onlaynka ee is-dhex-galka fursadaha, koorsa-shaqo-sannadeedka sannadkii hore, iyo mashruuc cilmi-baaris oo caalami ah oo xagaaga ahtaah oo u baahan u safridda qoyskeega ee ay asal ahaan ka soo jeedo - Taaliah waxa ay ku dadaalaysaa in ay maarayso casharadeeda. Sidan, oo la dhafay qaab waxbarasho ee PPS oo xor ah, ayaa Taaliah siin doonto fursad ay ku hesho tababar lana jaan-qado mashruuceeda ayadoo sii wadato waxbarshadeeda.




## Toni

Toni waxay bilaabi rabtaa iskuul sare. Waxay ahaayneen tijaabiyyaala tiknoolojiyadaha cusub ee Portland State University tan iyo fasalka 4aad. Waayo-aragnimadaan ayaa u suuro galisay in ay naqshadeeyasha ka ccaawiyaan helidda isku-dhafka agabyada ugu wanaagsan ee ka caawin karto waxbarshada iyo tayada nolosha. Waxay sidoo kale ka caawisay buuxinta shuruudaha tiigsiga qalin-jabiyaha ee ah Xalliyaha dhibaatooyinka si wadashaqeyn iyo wadajir leh.



**Victor**

Victor, waa macallinka qibrad dheer leh, haduu galayaa sanadkiisi 20aad ee macalinimo, sidi uu abid u jeclaa fasalka ayuu walina u jecelyahay. Marar badan baa lagula taliyay in u isku diyaariyo maamule in uu noqdo balse wuu iska diidaa mar waliba. Macalim joogo sanadka 2010 ahaan, wuxuu yaqaanaa isticmaalka tiknoloyiyadda wuxuuna diyaar u yahay tijaabinta fikradaha cusub. Asagoo rabo inuu kaydiyo faaiidadaa oo uu san ugu dhex-lumin barid aan casri la jaanqaad ahayn ayuu dadaalka sii badiyay, Victor wuxuu wakhtigiisa u isticmaalay in uu sii kordhiyo aqooniisa asagoona isticmaalayo khayraadka bilaashka ah si ula-socdo tiknoloyiyadda waxna ka barayo macalimiinta cusub casharada borograamyada lagu siiyay. Hadda waxaa uula kala shaqaynayaa koox iskugu jira macalimiin, qoysas, iyo arday dhisidda tiknoloyiyad cusub oo ka caawin karta ardada in ay fahmaan fikradaha kala duwan ee waqtiyada kala duwan ee taariikhda.

**Demarcus iyo Alejandro**

Demarcus iyo Alejandro waxay ahaayeen saaxiibo tan iyo markay yaraantoodi waxbarshada isla bilaabayeen, Marki koobaad ee la baray Tiigsiga qalin-jabiyaha. Hadda waa fasalka todobaad, Tan iyo markay ahaayeen afar jir ayay yaqaaneen waxa ay tiigsanayeen, garashadaa cad baana u sahashay in ay yeeshaan lahaansho ah sida ay wax u baranayaan. Maadaama ay yihii arday kala jinsiyad iyo qoysas kala nolo qibrad ah, waxay ka wada shaqeeyeen mashruucyo is-daba joogo oo baarida saamaynta jinsiyadaha ayagoo la raadinayo xal lagu xalinayo dhibka. Mashruucyadaan waxay qeyb qaateen buuxinta qeybaha Isbeddelka hoganka Sinaanta Jinsiyadaha iyo Xaliyaha dhibaatooyinka si wadashaqeyn wadajir leh.

**Chen**

Chen waxa uu ka shaqeyeeyaa waaxda miisaaniyadda ee xafiiska dhexe. Way is wanajin jirtay oo ku dadaali jirtay shaqadeeda, balse shan sano ka hor, iyada iyo shan kale oo ah saaxiibadeeda ka yar, ayay qaatay koorsko kordhinayso xirfadeeda oo furtay indhaheeda waxbadan ka ogaysiisay xiriirka ka dhaxeeyo sinnaanta, miisaaniyadda iyo qeybsiga khayraadka (hantida). Tan iyo goorta ka dib waxay u heelanaatay u doodidda sinnaan u qeybsiga khayraadka, waxaana marar badan lagu casuumay in ay la hadasho kooxaha bulshada ku hawlan sinnaanta iyo xirfadlayaaasha maaliyada ee rabo in ay fahmaan sida ay shaqoodada oogu xalin karaan cadaaladda bulshada.





## Hawlgal-dadaal shaqsiyadeed, Saamayn guuud

Iyadoo ay nidaamka waxbarashada iyo dadkeedu ay yihiin tiir-dhexaadka Aragtida-fog, PPS kalgied ma hirgelin karto. Hadii aynu rabno in dhammaan ardadeenu ay gaaraan Tiigsiga qalin-jabiyaha, waxaa na saaran mas'uulyad guud oo bulshadeed si ay suurto gal u noqoto. Waaan u baahannahay inaan isku duwno oo aan isku xirno dadaalladeena si aan u qeexno una wadaagno hadafyadeena dhammaan "deegaankeena." Hirgelinta horumar waara waxay u baahan tahay inaan si macno leh ula shaqeyno qoysaska, hoggaamiyayaasha beesha, u doodayaasha dhalinyarada kale, iyo hagayaal, isla markaana abuuraan iskaashiyo iyo hogaamiyayaasha deeqaha.

Waxaan ubaahan nahay hogaamiyayaasha madaniga ah inay saameyn ku yeeshaan siyaasadda, sharciyada, iyo dadaalka bulshada si loo hubiyo in dhalinyarada iyo qoysaska lagu taageerayo ujeedooyinkaas. Marka aynu isku heelno natijjo samayn aynu wada wadaagno, kadibna ka shaqaysiino ururdadeena gudahood iyo garashadeena si aynu u helno sida ugu wanaagsan ee aynu ku gaari karno hadafyadaa, qeyb walba oo bulshadeena ka mid ahisbeddel bay u dhix-dhuuqsataa. Fikir kaan wada jirka ah wuxuu si weyn u kordhiyaan fursadaha ay si guul leh oogu caawin karto dadkeena yaryar.

Waxaynu rabnaa inaan helno ra'yiyadiina. Maxaad samayn kartaa si aad u taageerto Tiigsiga Qalin-jabiyaha, Ahmiyadda Macalimka, iyo Isbeddelka Nidaamka Waxbarasheed? Seed u saamayn kartaa dadaalada ururadaada, qoysaskaaga, iyo kooxaha bulshada si ay oga shaqeeyaan gaaridda hadafkaan? Faldan nagu biiri fikrikaaga iyo kan dadka kale iyo ururada bulshada.

Waad ku mahadsantahay taageeradaada.

**Lifaaga  
Marxaladaha Mustaqbalka**



# Horumarinta ama fududaynta Waxbarashada guud?

Dunida maanta waa mid aan la kala saari karin oo uu caad fulay xadka u dhixeyyo dhabta/dhalanteedka, gudaha/dibadda, iyo robotka/bani'aadamka. Isku-dhafka tirknoloyiyadda sida fudud loo heli karo kordhin karana xawaaraha, habbonaanta, noolashana looga faaidaysanayo la shaqaynta mashiinada, iyo soo badashada robotiga iyo mashinada kale ee si wanaagsan u adeego.

Kadib kororka qalabaynta, waxaa xoogaystay baahida loo qabo shaqaalaha bani'aadamka ah ee la qabsan karo isbeddelka iyo doorarka cusub si loo dhamaystiro waxqabadka mashiinada. Tani waxay abuurtay baahi joogto ah ee in la kordhiyo lana cusboonaysiyo xirfadaha si shaqaalahaan loogu guulaysto mustaqbalka. Horumarinta waxbarasho ee deegaanka iyo internetka oo ka jawaabaya horumarinta waxbarashada degdega ah ee

loogu talagalay dadka waaweyn oo raba inay bartaan xirfado cusub iyo aqoonta si ay si degdeg ah u noqdaan kuwo ku guuleysta jawiga shaqada ee mar-waliba isbedelayo. Qoysaska yaryar ee 2030 waxay la kobceen intarneetka iyo dhaqamada xididaystay ee baraha bulshada iyadoo macluumadka wax waliba ay heli karaan. Intaa waxaa dheer, dadku waxay samaynayaan go'aano wax iibsi oo la jaanqaadaya qimaha bulshadooda iyo siyaasadeedba, si la mid ahna, qoysasku waxay raadinayaan habab waxbarasho oo la jaanqaadaya qiyamka, anshaxa, iyo danta shakhsiyeed ee carruurtooda. Sababtoo ah waxay iska waraystaan wax walba, waalidiintu waxay si joogto ah u raadinayaan siyaabaha iyo meelaha ugu wanaagsan ee lagu caawin karo caruurtooda. Tani waxay keentay in qoysasku ay guryaha oogu dhigtaan ilmahooga iyo fursado kale inay ka baaraan xarumo cusub oo ku yaalla magaalada. Qoysaskaan waxay asxaabtooda ka taloojin ka dooneen si ay ugu helaan waxbarashada qaas ah ilmahooga.

Isbeddelkaan ah sida iyo meesha waxbarashada laga helayo, ayna la socoto walaac balaaran ee laga qabo isbeddelka uu la imaan karo tirknoloyiyadda faafaysa aaya sabab u noqotay dib-u-habaynta ka daahday iskuulada dadweynaha. Macalimiinta waxay wada shaqeyn la wadaan qoysaska, ardayda, iyo hay'adaha kale ee maxalliga iyo caalamiga ah si loo hago dhisidda hab-raaca canug waliba, taa mugdi sii galinayso farqiga u dhaxeeyo iskuulka oo ahaa goobaha koobaad ee waxbarasho iyo ka faaiidaysiga waxbarasha sinwalbo meel walbo looga heli karo. Sidoo kale, isbeddelka xawaaraha sare ah aaya ka qaybqaatay dareenkala go'a. In la ogaado in ardayda weli u baahan yihiin meelo ay ku

kulmaan, isku-dhexgalaan, ayna ku xirmaan si dareen wadajir u abuurmo, iskuuladu waxay hayaan doorkooga ah in ay yihiin meel nabad ah oo carruurta loogu talagalay. Barayaashu wali waxay bixiyaan isdhexgalka aadanaha, hogaaminta, iyo jihada loo baahan yahay xitaa iyadoo qaar ka mid ah "manhajka" ay helaan dibadda dugsiga. Sinniinnada aaya inta badan ku faafaya hay'adaha waxbarashada dad-weynaha, marka laga reebo kuwa yaryar ee qorshaynaya isbedelkan. Hay'adahan ka fakaro mustaqbalka, sida Portland Public Schools, waxay dhiseen iskaashiyo sii kordhiyo fursadaha waxbarasho ee hal-abuur leh kana baxsan sidii hore ee ku xannibnayd dhismaha iskuulka. Ayagoo ka dhigayo sinnaanta iyo daahfurnaanta aasaaska hore ee dib-u-naqshadaynta, PPS waxay hormuud ka noqtey iskaashiyada ganacsiga maxalliga ah iyo kan caasimadda. Kuwani waxaa ka mid ah in ardada danyarta ah la siiyo adeegga degmada iswado ee "learning transporters" iyo qeybinta kaararka bilaasha ah ama la qjimo dhimay ee laga aqbalo maqaayadaha Portland--oo intooda badan qjimo u dhimis u sameeyo ardada wato kaararka cuntada.

Dhammaan caasimada waxaa ku baahsan goobaha wax ee casriga ah ee ay ku calaamadaysantahay "PPS Learning Hub"-- waa goobo ay PPS kula hawlan tahay hay'adaha waxbarashada ee deegaanka si ay u bixiyaan fursado waxbarasho uu heli karo ardayda maalintii oo idil. Tusaale Maktabadaha Dadwaynaha ee Portland (Portland Public Libraries) waxay hawl wadaag la wadaa PPS si loo maalgeliyo ooardayda yaryar loogu helo 3D printers si ay u bartaan sida loo naqshadeeyo qalab alaabayda ay ku cayaaraan oo laga sameeyay caagadaha dib-loo rogay. Macalimiinta PPS waxay ka shaqeeyaan maktabada si ay u bixiyaan khibradahan



waxbarasho ayna u kaashadaan ingineerada ka shaqeeyo matabada. Qoysaska rabo in ay ogaadan khayraadka matabadaha waxbarshada ee sida ugu fufud loo heli karo dunida, Adeegga tiknolojiyadda "Unstacked Billboard" ayaa kaa caawin karto raadinta khayraadka loogu raadin badan yahay ee waxbarashada ee dunida. Akoonadaan la gujin kara si joogto ah ayaa loo cusboonaysiyyaa, ayagoo kor soo saarayo maclummaadka faahfaahsan uguna caansan si fududna loo heli karo. Matabadaha xitaa waxay laamo ka fureen dibadda dhismahoogi aas-aasiga ahaa oo waxay kaashadeen macalimiinta iyo barnamijyada ku hawlan quudka la joogtayn karo si ay u abuuraan borograamkooga wacygalinta cuntada dhibadda beeraha magaalada ee hawl-galo.

PPS-na sidoo kale waxay hay'adaha la samaysay iskaashiyo noocaas kale ah. Mid ka mid ah iskaashiyadaa oo lala sameeyay Nidaamka xabsiga ayaa fidinayo hawlgalka waalidka iyo taageerada dareen ee bulshada ayadoo la adeegsanayo adeegga "Holographic" ee bilaashka ah halkaa oo ardadu la wadaagi karaan waalidka ku xiran xabsiyada Oregon akhrinta sheekoojin ama si wadajirka ah hawlo waxbarasho oo ay diyaariyen macalimiinta PPS u sameeyaan.

Qoysaska ilmaha yaryar leh waxay goor-horaba helaan fursado waxbarsho ee la iibsan karo, iyadoo kor u sii qaadayso rabitaanka loo qabo jadwal waxbarasho oo si qas ah u jaan-go'an ee ilmaha da'da iskuulka gaaray. Janaalka youtube-ka ee caanka ah ee Adventure Me(oo ay bilaabeen qoysaska) waxay suuro galisaa in waalidka u qas yeesho barasho xiiso leh ayagoo jilaayaasha

badalayo si ay u noqoto mid la jaanqaado waxay ilmahooga danaynayaan. Adventure Me waxay bilowday diyaarinta casharada caruurgaartay da'da iskuulka waxyna bilowday inay la shqeeyaan Portland Public Schools si casharadeeda ugu tijaabiyaan caruurgaartay waaweyn.

Hadana goob kale oo waxbarasho ee ku salaysan iskuulka, firik-wanaagsan loo naqshadeeyay iyo injineernimo ayaa iskugu yimid iskuul deegaan halkaa oo macalimiinta ay fuliyaan naqshadaunta iyo dhisidda ablikeeshano taleefon oo loogu talagalay in ay taageeraan baahiyada qaaska ah ee waxbarshada qaaska ah ee bulshada. Ardayda barta ingineernimada waxay la shaqeeyaan ardada taxadarka qaaska ah u baahan si loo fahmo baahida isticmaalayaasha la iskagana kaashado naqshadaynta ablikeeshanada si loo taageero waxbarshadooda.

Goobo kale ee waxbarshada dadka waaweyn ayaa la habeeyay halkaa oo tababarayaasha xirfad dhisidda iyo hay'adaha deegaanka ay si cayiman iskugu yimaadan si ay u dadka waaweyn oogu wada dhisaan waxbarsho isku-dhaf ah iyo fursado kala duwan lagu xirfadaynayo. Waxbarshada intarneetka ayaa Iyadoo la adeegsanayo adeegga holographic-ga ah barayso xirfadaha sare ee dab-damisyada ayadoo sii kordhinaysoisticmaalka tiknolojiyadda si loo baahi tiro xirfado kala duwan ee dadka waaweyn si looga maarmo jaamacadaha bulshada iyo kuwa tiknikol ah.

# Portland 2030: Qof waliba faaiido ma u tahay dhaqaale kobaca guud?


Tani waa duni ay Portland ku tiirsantahay shaqada ay ku hogaamiso ee adkaysiga caasimad deegaanka, hawlaho la xiriir banaan bixidda iyo sii jiritaankeege. Taariikhdaan ayaa Portland gacan ka-siiisay kasbashada warshadaha cusub ee u soo baxayo buuxinta baahida taagan ee ah wadan isku dayayo sii wadida heer nololeed iyadoo wax waliba ay badalmayaan. Warshadaha kobcayo ee dajinayo shuruudaha sii joogtayta nolosha deegaanka lagana yaqaano caalamka aaya caan ka dhigay Portland. Waxaa si asal ahaan loo dhoofiyay Ganacsiyada cuntada iyo cabitaanka ayadoo loo maraayo isku-dhaf casriysan ee Sharciyayn, 3D daabiciida agabka cuntada, iyo ku diridda maadooyinka lagu keenay Portland diyaarad duuliyo la'aan ah. Taraagyada cuntada ee PDX waxaa kaga helaa caasimada door ah ee dunida, balse qiimaha wanaagsan ee Portland ayaa sareeyo oo cods sharci-ganacsiyeed ah oo ka yimid Dubai ayaa la diiday.

Da'yarta (Gen Z) hadda soo kacayso waxay doondoonaayaan qaab ay oola qabsadaan mustaqbalka mugdiga ku jiro-aa ay ka mid yihiin Isbeddelka cimilada, dadka da'da ah ee xanaanada u baahan oo batay, iyo isbeddelada dagdaga ah ee siyaasadda caalamka, kuwaa oo rabo in ay reero yeeshaan waxayna ku jeclaadeen Portland cimilada, shaqooyinka iyo dadka ay isku fikirka yihiin. Magaaladu way dhismaysaa, laakiin isku-dhafka shaqooyinka wanaagsan ee soo jiidanaya dadka adduunka oo dhan, dadaallada xakamaynta cimilada ee ka mamnuucay dhismaha dhinacyada wabiyyada Willamette iyo Columbia, iyo diidmada degaanka ee xawaaraha dhismaha aaya cadaadis weyn saaraya guriyaynta. Si looga fogaado meelaha fog ee socdaalka, dadka Portland waxay bilaabeen in ay si caadi ah u dhisaan tiro xarumo yaryar ah, oo ku kala firirsan dhinaca koonfureed ilaa waqooyiga magaalada.

Qiyaastii 2023, cimilada oo bilowday saamaynta dibad-bixidda caanka ah ee Oregon, sameeyayaasha waaweyn ee noocyada dharka lagu banaan baxo ee Portland ay caan ku ahayd aaya halis oogu jiray in ay guuraan. Balse, dhib-u-xallinta sida wadajirka ah ee maamulka magaalada Portland, guddoomiyayaasha degmooyinka Multnomah, iyo kambaniyadaba waxau dhalisay hal-abuur xoog leh ee qaabab cusub ah(oo looga hortagayay samaynta cimilada), iyo beddelid cusub ee qalabka iyo dharka ee cimilada looga hortagayo/lagu badbaadinayo shaqada. Qalabka sare ee tiknoolajiyada aaya horseeday horumarinta dharka fudud ee dab-damiska, iyo isku-dhafka

maasgarada iyo neef-siiyaha baaskiliga oo noqday mid dunida aad looga gato.

Dhulwaynaha Portland/Vancouver waxay haysaa wadadi ay ku noqon lahayd caasimadaha ugu weyn ee ku yaal West Coast. 20kii sano ee la soo dhaafay, xaafadaha barwaqaqada ah, ee ka bilowdo Clackamas, Yamhill, iyo Washington counties ee koonfureed, gobolka Clark, WA, waqooyiga, waxay bilaabeen in ay isku ahaadaan horumar isku-xiran oo balaaran. Portland / Vancouver aaya si rasmi ah loogu dhawaaqay in ay tahay magaallo dhinacyada ka dhisan 2027-kii, kadibna dhowr jeer la isku dayay in dib loo magacaabo oo aan lagu guulaysan sababtoo ah dibad-bax ballaadhan oo ka yimid Portland iyo Vancouver labadaba. Qeybaha kore ee dibadda magaalada sidoo kale aad bay dhisantay waxaase xanibay daedadka la saadaaliyay ee wabiyyada, waxaana jira arbin jooto ah ee ku saabsan meesha loo rari lahaa PDX. Guryaha dadka badan ay wada dagaan aaya sii badanayo, iyadoo la dareensanyahay in sidaan aan lagu aqoon Portland. Dadku waxay u kala qeybsanyihiin in la fahmo dhisidda guryo badan oo la awoodi karo iyo ilaallinta hab-qaabeedka magaalada. Ka dib markii dibad baxyo isdabajoog ah oo abuuray kacdoon, iyo korriin weyn ee dadka teendhooyinka dhigtagay Washington Park, magaaladu waxay samaysay guriyeyn dad badan dagi karaan, bay'adana u roon, sicirka suuqana ah lana awoodi karo hadana muuijiyay hab-qaabeedka magaalda Portland. Abaalmarinta ugu horreysa waxaa la soo saaray 2029, shirkad Hong Kong/Icelandic ah,



waxaana jira dareen farxad leh oo ku saabsan natijada ugu dambeyso

Si loo hubyo dadka in ay ku safraan magaalada gudaheeda, wadooyinka asalka ah ee tareenada iyo baaskiliyada ayaa la balaariyay oo la cusboonaysiiyay adeegga tareenkana la kordhiyay, iyadoo wadooyinka lagu xiray soolar iyo larka riinjga ah ee waari karo. Gawaarida is-wado oo sidoo kale u qaado dad badan oo reer portland ah shaqooyinka iyo iskuulada maalin waliba. Balse, xitaa adeegsiga qorshayn taxaddar leh iyo ablkeeeshanada ku salaysan tiknoloyiyadda, Xaaladda gaadiidka ayaa wali dhib ah in ka bdan 10 sano. Dhab ahaan, xalal cusub ayaa suural gal ka soo socdaalidda guryaha raqiiska ee shishe.

Walaaca ku saabsan sinnaan la'aanta dakhliga ayaa sidoo kale keentay tallaabooyin kala duwan in lagu gudbo dhammaan aagga metro, oo ay ku jiraan canshuuraha cusub ee magaalooyinka iyo dhiirigelinta shaqaalahaa ee ugu muhiimsan sida barayaasha, shaqaalahaa caafimaadka, bilayska iyo dab-demiska. Xakamaynta kirada ayaa sidoo kale ugu dambeyntii loo soo bandhigay qoysaska, oo ay ku jiraan qoysas la xushay, oo helo lacag ka yar inta jaango'an, haystana carruur yar yar, oo ay ku jiraan waayeelka ama xubnaha qoysaska leh xaalado caafimaad oo joogta ah.



# Portland baa barwaqo inay tahay loo wada arkaa

Tani waa duni ay Portland kor u qaaday hogaankeega deegaanka waxayna dunida u hor-boodaysaa u dooddida isbeddelka cimilada goor dadaalada qaranka ay cagajid yihiin. Warbixinta 2018 ee Qaramada Midoobay ee ku saabsan isbeddelka cimilada ayaa hagaysay horumarka Portland si loo gaaro himiladeeda ah in lagu yareeyo qiiqa kaarboonka ilaa 45 boqolkiiba heerarka 2010ka halka lagu gaaro 2030. Bishii Diseembar 1, 2030, ayaa duqa magaalada Portland ku dhawaaqay in magaalada ay kor u dhaaftay himilada, joojinta qiiqa 60 boqolkiiba, oo si wanaagsan u socotay ilaa boqolkiiba 100 illaa 2050. Saamaynta isbeddelka cimilada ayaa noqoteey mid aad u muuqda, magaalada ayaa si aad ah u soo jiidata kuwa doonaya inay ka baxsadaan xaalado xun meelo kale. Iyadoo si weyn loogu maal-galinayo kaabayaasha cagaaran iyo siyaasadaha kale ee magaalada oo dhan, Portland iyo meelaha ku hareeraysan waxay noqdeen meel ay ku sii jiri karta.

Iskaashiga LucidEnergy iyo Portland Water Bureau ayaa suura galiiyay guushaa. Iyadoo ay dardargalinayso baaxadda 20-sano ee qandaraaskooda ah, hadda dib u cusboonaysiinta taariikhda asalka ah ee taariikhda 2038 ee 2050, Portland ayaa ku dhawaad dhameystirtay inay hoos u dhigtay LucidPipes oo magaalada ah oo dhan, iyada oo muwaadiniinta siinaysa waxqabadka tamarta korontada biya lagadhaliyay ku dhowaad boqolkiiba 50.

Qaybaha kale iyo shirkadaha ayaa dib u soo nooleynaya ama u abuuraya si ay u gaadhaan horumar la xajin karo. Qaybaha xayawaanka, kalluumeyisiga, iyo beeraha ayaa ku soo batay, iyada oo horumarin cusub lagu sameeyo hababka joogtada ah ee dib u habeynta iyo kala-duwanaanta noocyada. Shirkadaha ku soo badanayo maaraynta isbeddelka cimilada, gurmadka musiibogurisiinta, iyo daryeelka caafimaad ee shakhsii ahaaneed ee la qaadi karo ayaa sidoo kale badanayo. Qaybahaasi waxay si dhakhsa ah u bedelayaan fursadaha shaqo ee Portland.

Qaar badan oo ka mid ah shaqooyinka cusubi waxay ka jiraan tamar-dhallinta sida cagaaran ah, hoos u dhac ku yimi wax soo saarka cunnada iyo hilibka lagu saneyyo shaybaarada, dib u isticmaalida iyo dib u warshadeynta alaabta, kaabayaasha cagaaran, iyo beeraha.

Qeybtan ugu dambaysa waxaa ka mid ah warshadaha khamriga, oo helay korodhka faaliidda iyada oo gobollada kale ay wajahayaan soo-saar yari ay sabab u tahay abaarta iyo dababka kacay. Tani waxay macnaheedu tahay in loo-shaqeeyayaashu ay soo jiidanayaan oo dhiiri galinayaan kuwa ka shaqeyn kara warshadaha ka fakaro-joogtayda, dhalinyarada adduunka oo dhanna waxay codsanayaan shaqooyinkan.

Dhaqdhqaqaqayaasha bay'ada, cilmi baarayaasha, iyo saraakiisha kale ee dawladda hoose ayaa booqanaya Portland si ay u yeeshaan aqoonta ah sida waarto wax u samanta, heerarka shakhsiyeed iyo mid magaaloooinba, si loo geeyo aqoontaan gobollada kale. Qayb ahaan shakhsiyadka, martidaas waxaa ku riyaaqay u heelanaanta muwaadiniinta ay u heelanyihiin sii wadidda xal waaro. Intooda badan waxay ku safraan basaska shidaal-hydrogenka cabو, baaskiilada awoodda qoraxda qaato, iyo tareenka xaweereeyo. Sidoo kale, muwaadiniinta ayaa



qabanqaabiya seminaaro bulshadeed si ay u horumariyaan ugana doodaan maaraynta qashinka iyo horumarinta biyaha ee guryahooda iyo ganacsigooda. Heerka magaalada, saraakiisha la soo doorto ee Portland ayaa ku guulaystay inay karti u leeyihii in ay si guul leh u dhaqan galiiyan siyaasadaha maxaliga ah inkastoo ay jiraan ajandayaal heer qaran ah oo xanibayo himilooyinka ujeedooyinka isbeddelka cimilada ee meelo kale oo dalka ka mid ah.

Iyadoo laga duulayo jawaabta qaran, magaaloojin kale oo badan oo Maraykanka ah ayaan diyaar u ahayn dadka degaan kooda, iskaba daa caawinta qaxootiga cimilada ee u baahan dib-u-dajin ee ka soo jeedo gobolada baaba'ay ee Alaska, Louisiana, Florida iyo Puerto Rico. Portland waxay soo dhaweysay boqollaal ka mid ah qaxootiga isbeddelka cimilada, laakiin dadka Portland waxay dareemayaan in degdeg loogu baahan yahay in ay dowladda qaranka dadaalka badiso si khayraadkooga aan loo baa'bin.

Horumar la'aanta heer qaran iyo caalamkuba ayaa ooga sii daraya saameynta dhabta ah ee isbeddelka cimilada. Sumacadda hore ee

Portland ee ku raaxaysiga iyo ku banaan baxa dibadda, iyo shirkadaha dharka iyo qalabka ku xiran iyaga, ayaa hoos u dhacaya. Inkasta oo Oregon ay la soo gudboonaatay heerkul sarre, dhibaataada ugu weyn waa dababka dabiiciga ah ee ka socda California iyo British Columbia, kuwaasoo saameeya tayada hawada ee Portland iyo saamaynta dibad-baxyada dibadda muddo dheer. Shirkado badan ayaa guurayo si ay u helaan goob habboon iyo shaqale, iyo si ay uga baaqsadaan qarashka kirada ee kordhayo kadib ku soo badashada warshadaha kale.

Portland Public Schools waxay dib-u-qalabaysay inta badan manhajkeeda CTE si ay diiradda u saarto xirfadda kaabayaasha cagaaran, ayadoo si dhaw ula shaqaynayso kambaniyada si ardayda u helaan qibrad dhab ah. Ardayda soo qulqulaya ee ka soo jeeda deegaannada isbeddelka cimilada waxay macnaheedu tahay in macalimiintu ay adeegsadaan waxbaridda qaaska ah si loo taageero ardayda ay dhaafeen casharada inta ay ku jireen xilligi kala-guurka iyo musiibooyinka dabiiciga ah.

## Mahadcelin

Marka laga reebo kuwa ku xusan hoosta, Aragtidani-fog waa hawsha xubin kasta oo ka tirsan bulshada Portland Public Schools-ardayda, qoysaska, barayaasha, iyo xubnaha bulshada-kuwaas oo ka soo qayb galay shir bulsheed, buuxiyay jawaab celin sahan, ama waxay siiyeen jawaab celin bulshada dhexdeeda ku rakibidda madxfaka Oregon Museum of Science and Industry (OMSI).

Aad baan ka qeybgalkaaga kaaga mahadcelinaynaa!



Gudiga waxbarashada ee  
The Portland Public Schools

### Kafiilka Mashruuca: Gudiga waxbarashada ee The Portland Public Schools

Dr. Rita Moore, *Guddoomiye*  
Dr. Julie Esparza Brown, *guddoomiye ku-xigeen*  
Paul Anthony, *Agaasime*  
Scott Bailey, *Agaasime*  
Julia Brim-Edwards, *Agaasime*  
Amy Kohnstamm, *Agaasime*  
Nick Paesler, *Wakiilka ardayda (lama sawirin)*  
Dr. Michael Rosen, *Agaasimaha Guadalupe Guerrero, Kormeeraha Guud*

### Hogaanka Mashruuca

Stephanie Soden, *Taliyaha Shaqaalaha*

### Hogaanka Kooxda

Jonathan Garcia  
*Madaxa la hawlgalka bulshada*

### Kooxda Hirgelinta

Kooxaha isku-dhafka ah ee waaxda arrimaga gudaha ee degmada ee gacan ka gaystay isku-duwidda iyo fududeynta geed-socodka Aragtid-a-fog.

Scott Bailey, *Agaasimaha Gudiga Iskuulka*

Loretta Benjamin-Samuels  
*Agaasime Sare, Maareeyaha Shaqaalaysiinta xirfadaha dabiiiciga ah*

Dr. Jill Bryant  
*Maamulaha Barnaaamijka, Caafimaadka iyo badqabka aradada*

Stephanie Cameron  
*Agaasime Sare, Isgaadhsiinta*

Das Gupta Maareeyo  
*Sare, Adeegga Macaamiisha IT-ga*

Camille Idedevbo  
Sarkaalka Xiriirkha kambaniyada  
iyo Hay'adda

Dani Ledezma  
*La taliyaha sare ee Sinaanta Jinsiga iyo Caddaaladda Bulshada*

Dr. Kimberly Matier  
*Agaasimaha Sare ee Barashada xirfadaha iyo Hogaaminta*

Rosanne Powell  
*Maareeyo Sare, La xiriirkha Gudiga Waxbarashada*

David Roy  
*La taliye, Isgaadhsiinta Gudaha*  
Elisa Schorr  
*Agaasime, iskuul Sare Barnaamijyada*

Dr. Aurora Terry  
*Agaasime Sare, U diyaarinta kuleejka iyo Shaqada*

Courtney Westling  
*Agaasimaha, Xiriirkha Dawladeed*

### **Isbahaysiga Hogaaminta**

Kooxo kala duwan oo ah arday, xubnaha qoysaska, macalimiinta, maamulayaasha, shaqaalaha degmada, iyo wada-hawlgalayaasha bulshada ee isku hawlay shaqooyin kala duwan iyo baaridda talooyinka bulshada si loo dhiso waxyaalah Aragtida-fog.

Paul Anthony  
James Appelhanz  
Scott Bailey  
Ellie Baumgartner  
Loretta Benjamin-Samuels  
Gabrielle Bolivar  
Kristen Brayson  
Julia Brim-Edwards, Agaasime  
Jill Bryant  
Nicole Buchanan  
Kira Busch  
Petra Callin  
Stephanie Cameron  
Isaac Cardona  
Alisha Chavez  
Pat Christensen  
Suzanne Cohen  
Serena Cruz  
Kregg Cuellar  
Yvonne Curtis  
Kathleen Ellwood  
Julie Esparza-Brown  
Muna Farah

Chris Frazier  
Jonathan Garcia  
Hilario Gonzalez  
Aidan Gronauer  
Guadalupe Guerrero  
Das Gupta  
Andrew Harker  
Nancy Hauth  
Claire Hertz  
Camille Idedevbo  
Nicole Iroz-Elardo  
Elizabeth Israel-Davis  
Cheryl James  
Angela Jarvis-Holland  
Susheela Jayapal  
Dan Jung  
David Kays  
Cherie Kinnersley  
Roger Kirchner  
Eilish Koch  
Amy Kohnstamm  
Liz Large  
Cynthia Le  
Frank Leavitt  
Dani Ledezma

Melissa Lim  
Paul Lumley  
Raddy Lurie  
Marvin Lynn  
Brenda Martinek  
Kimberly Matier  
Inger McDowell-Hartye  
Jeffrey McGee  
Mark Mitsui  
Kristin Moon  
Rita Moore  
Matt Morton  
Deb Mumm-Hill  
Marcus Mundy  
Myrna Muñoz  
Susan Nielsen  
Faisal Osman  
Shei'Meka Owens  
Travis Paakki  
Nick Paesler  
Margarett Peoples  
Marty Perez  
Barry Phillips  
Rosanne Powell  
Sharon Reese

Mike Rosen  
David Roy  
Carmen Rubio  
Elvira Sanchez  
Erika Schneider  
Elisa Schorr  
Tori Siegel  
Noelle Sisk  
Stephanie Soden  
Nathan Stanley  
Aurora Terry  
Carmella Thomas  
Luis Valentino  
Mark Van Hoomissen  
Holly Vaughn Edmonds  
Jessica Vega Peterson  
Saiming Wenger  
Courtney Westling  
Scott Whitbeck  
Takiyah Williams  
Kate Willis  
Elona Wilson  
Korinna Wolfe  
Zhen Zhao  
Shayla Zhen

### **Hab-raaca qorsheynta Aragtida-fog iyo Fududeynta: Prospect Studio SF**

Dr. Fiona Hovenden and Sonya Lopes  
*Hogaan kalkaalka mashruuca,  
Istaraatijiyada Fiirada-dheer,  
Qorsheynta, iyo Fududeynta*  
Jenny Hoang  
*Istaraatijiyada Fiirada-dheer,  
Qorsheynta,  
iyo Fududeynta*  
Myrna Newcomb  
*Sawir Naqshadayn*  
Julian Wong-Nelson  
*Taageerada Hogaanka Isbahaysiga*

[www.prospectstudiossf.com](http://www.prospectstudiossf.com)  
[info@prospectstudiossf.com](mailto:info@prospectstudiossf.com)

### **Xuquuqda Sharaxaaddda**

Bogagga 40, 41, 53: Sasi, Rawpixel Ltd.

Bogagga 45, midig: Metamorworks, Shutterstock

Bogga 47: Pavel Chagochkin, Shutterstock

Bogga 49: Iurii, Shutterstock

### **Dhammaad**

1. AORTA, Anti-Oppression Resource and Training Alliance  
[aorta.coop/](http://aorta.coop/)

